JAMHURIYADDA DIMOQRADIGA SOMALIYA

Wasaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

PJ
2534
A2
A36
1972
v4

# Buugga Afraad

# AFKA

# DUGSIYADA HOOSE

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

WAXAA QORAY: GUDDIGA AFKA SOMALIGA

MUQDISHO 1972

4/30/86

# ARAR

Buuggani waa kii Afraad ee afka, waxaana loogu tala galay inay bartaan ardada Dugsiyadda Hoose ee Sannadka Afraad.

Inkastoo buuggani ku qoran yahay Afkii hooyo, haddana waxaa laga codsanayaa macallinka in fiiro gaar ah u yeesho sidii erayada ku qoran ee cusub ugu fududeyn lahaa ardadu.

Waxanna la filaya in buuggani waxtar weyn u yeesho ardada dhigata sannadka afraad ee dugsiyada hoose.

Guddiga Af Somaliga

## Casharka 1

## SHIIKH SHAAFICI

Shiikh Shaafici, Ilaah ha u naxariistee, waxa lagu magacaabi jirey Maxammad Bin Idris, wuxuuna ka mid ahaa afarta mad-habood ee Islaamka ninkii wax ka dejiyey. Shiikh Shaafici wuxuu ku dhashay magaalada Qasa. Habartiis baa la sodcaashay oo la aadday Maka, dalkii dadkiisu ay deganaayeen. Isagu Quraanka kor buu ka bartay, diintana wuxuu ka akhristay Xaramka. Dabadeed wuxuu aaday Madina, meeshaas ayuu Shareecada Islaamka si fiican uga bartay. Macallinkiisa waxa la dhihi jirey Shiikh Maaliki. Shiikhaas waa kan leh Mad-habta lagu magacaabo «Maaliki».

Shiikh Shaafici kuma joogsan intaas ee dadka iyo dalka Carabta ayuu dhex maray, markaasuu noqday nin aad fasiix u ah oo dadkii waqtigiisa joogey ay la yaabeen aqoontiisa.

Shiikh Shaafici Masar buu yimid oo ka bilaabay kutubaha Shareecada akhrintooda. Shiikh Shaafici cilimigiisu waxtar buu lahaa oo culimo badan buu wax baray. Markaas ayaa wuxuu isna yeeshay Mad-habta la yiraahdo «Shaaficiya», taasoo ah mad-habta dadkeenu raacsan yahay.

Mad-habta Shiikh Shaafici dhulal badan bay ku faaftay oo ku yaal Asiya iyo Afrika. Dalalkaas waxa ka mid ah: Masar, Xijas, Ciraq, Yaman, Jasair, Seylon, Filibbin, Indunisiya, Siyam iyo dalka Somalida oo dhan.

Habeenkii oo dhan Ilaah buu caabudayey. Waagu markuu baryey oo uu salaaddii subax tukadey, buu soo qaatay faas weyn oo af badan. Wuxuu soo aadey geedkii, isaga oo damacsan inuu gunta ka gooyo. Dhabbaha waxa kaga hor yimid Shaydaan nin isu ekeysiiyey. Markay is nabdaadiyeen, ayaa shaydaankii weyddiieyey meesha uu ku socdo. Markaas baa Wadaadkii ku yiri, waxaan ku socdaa geedkaas. Markuu shaydaankii weyddiiyey wuxuu ka rabo geedka, wuxuu Wadaadkii yiri. «Waxaan rabaa inaan gooyo, maxaa yeelay geedka dad badan baa caabuda oo Ilaah ka dhigta». Dabadeed shaydaankii wuxuu yiri, «Ma goyneysid, haddaadan gadaal uga noqonna, wixii ku qabsada waad arki doontaa.» Wadaadkii ma dhegeysan. Labadoodi way is dirireen, markaasaa shaydaankii ka doonay inay heshiiyaan, wuxuuna u oggolaaday inuu siiyo 20 shilin subax walba. Wadaadkii waa yeelay, waana iska dhaafay geedkii oo wuxuu u xishay lacagtii. Dheef adduun ayuu door biday. Saddex subxood markuu qaatay lacagtii, ayaa subixii afraad Shaydaankii diidey inuu wax kale bixiyo. Markaasuu Wadaadkii la booday faaskiisii oo damcay inuu geedkii gooyo, laakin shaydaankii ayaa hor istaagay. Halkii bay ku dirireen labadoodi, waxana markan la legdey Wadaadkii. Markaas baa shaydaankii ku yiri «Ayaantii hore waad i legeddey. Haddii ay isugu kaa tegi lahaayeen insiga iyo jinniga oo dhan si ay kaaga

reebaan geedka goyntiisana kaama ay adkaadeen. Sababta oo ahayd inaad niyo wanaagsan lahayd. Waxaadna ku dagallameysey Ilaah daraaddiis, haddase waxaad ku dagaallamaysaa waayidda aad weydey lacagtii».

Wadaadkii intuu isku yaxyaxay oo uu gartay inuu gefey buu iska tegey isagoo adduun iyo aakhiraba seegay.

**Layli :**

**Ka jawaab:**

1. Muxuu arkay Wadaadkii?
2. Muxuu ahaa heshiiskii Wadaadka iyo Shaydaanka dhex maray?
3. Shaydaanku markuu adkaaday muxuu ku yiri Wadaadkii?

## Casharka 3

## NINKII RIDA SAFRIYEY

Nin baa beri safarsaday ri. Isaga oo weli aan magaalo gaarin, ayaa qorraxdii meel cidlà ah ugu dhacday. Markuu in yar socdey oo mugdigii so batay, ayuu wuxuu arkay mundul laga guuray oo cidla' ah oo jidka ku yaal. Ninkii wuxuu isyiri, mundulka caawa ku naso inta waagu kuu beryayo. Isaga iyo ridii waxay galeen mundulkii. Ninkii albaabkii buu xirtay oo seexday.

Goor ay tahay habeen barkii, ayaa ninkii dibedda u soo baxay. Markuu soo noqday albaaabkii ma xiran ee

wuu illaawey. Wax yar dabadeed, ayaa Libaax soo uriyey rida, inta uu soo gaatamay, mundulkii soo galay oo qabsaday ridii. Isla markiiba ninkii baa ku toosay shanqartii Libaaxa iyo rida eeashadeeda. Libaaxii markuu arkay ninka ku toosay, ayuu ridiiba faraha ka qaaday oo ninkii ku soo booday oo laba gabal ka dhigay.

Intii ninka iyo libaaxu mundulka dhexdiisa ku dagalamayeen, ayaa albaabkii xirmay.

Libaaxii markii uu ninkii iyo ridiiba diley, ayuu is yiri haddaba meesha ka carar. Hase ahaatee albaabkii oo xirmay daraaddi meel uu ka baxo ma uu helin. Markaasa libaaxii af labadii yeeray.

Cabaadkii iyo dhawaaqii ka soo baxayey libaaxa, ayaa dadkii agagaarkaas deganaa oo dhammi maqleen oo ku soo urureen mundulkii libaaxu ku xirmay. Dadkii waa yaabeen markay arkeen libaax, nin iyo ri mundul ku wada jira.

Taasi muran badan, ayay dhalisay. hase ahaatee sababtii muddo dheer dabadeed baa la ogaaday.

**Layli :**

1. Erayadan tixo ku dar:

   gadaashiis, isjir, istiri, qabso, gasho, aannu.

   ka, ku, kaga, ugu.

2. Waxaad qortaa sheekadii oo ku dhan lix sadar oo keliya.

## Casharka 4

## DHULKA ANDALUS

Waddanka Andalus la oran jirey, haatanse la yiraahdo «Dhulka Isbanya,» wuxuu ku yaal meel lagu tilmaami karo in Yurub geesteeda Koofureed looga duuli karo.

Kolkay Carabtu galeen dhulka la oran jirey «Maqrib» maantana loo yaqaan Maraakish, waxay muslimiintii waqtigaas ogaadeen inuu dhulka Andalus u dhow yahay oo loo baahan yahay si diinta islamka Yurub loogu faafiyo. Colka muslimiinta abbanduulahoodu wuxuu ahaa nin la oran jiray Daariq bin Siyad. Maalin ayuu ku yiri dadkii, «Haddii aynnu galno Andalus, waxaynnu Islaamka u furaynnaa dhul cusub oo diintu ku faafto.»

Nin ka mid ah ciidankaas baa hadloo wuxuu yiri, «Sidee bay u suuroobaysaa inaynnu «Andalus» galno, innagoo ogsoon inay badda cadi inoo dhexayso?»

Daariq hadalka ninkaas wuxuu uga celiyey, «Hadaynnu doonyo waaweyn samaysanno oo badda degdeg uga tallowno waa gaari karnaa. Xeebaha Yurub ee hoose haddaynnu dhaafno, hawl yari baynnu Andalus u geli karaynnaa».

Taladii abbanduulaha colkii muslimiintu way yeeleen. Doonyihii ayaa si degdeg ah loo sameeyey, ka dibna baddii bay kaga tallaabeen oo waxay gaareen dhul buuro kore leh iyo dhadhaabo waaweyn.

Markii colkii gudbay ayuu Daariq ka dareemay baqdin iyo dibunoqod ciidankiisa qaarkiis. Daariq geesinnimo ka sakow, wuxuu ahaa nin feejigoon oo himmad weyn leh. Si qarsoodi ah buu doonyihii oo dhan u gubey. Markay taasi dhacday buu colkii hadal cad u soo jeediyey oo wuxuu yiri, «Noqosho dib loo noqdaa shalay bay ninkii doonayey u suuroobi lahayd. Maxaa yeelay, jidka ayaa u furnaa. Maantase, ninna uma suurtowdo. Maxaa yeelay, waad aragtaan inuu jidku xiran yahay. Haddii taasu idiin muuqatay tan keliya oo inoo bannaani, waa innagoo geeri xalaal ah dhimanna oo dantaan u soo kacnay si weyn u gudanna».

Markuu abbaanduulihii hadalkiisii dhammays tirtay, baa ciidankii hor taagnaa si weyn ugu guuxay dhaaqaquu bilaabayna dib uma soo jeesan.

Kolkay muslimiintii galeen Andalus oo dhulkii u xasilay, yay markiiba diinta Islaamka faafiyeen oo masaajiddo badan oo aad u qurxoon , ka dhiseen. Khoorrigii buurta lahaa ee labada badood laysaga tallaabo waxay u bixiyeen «buurtii Daariq».

**Layli :**

1. Erayadan weero ku dar·

   kaga, lagu, inaynnu, u kala, u gudo.
2. Waxaad qortaa labadii hadal ee Daariq ku yiri ciidankiisa.
3. Daariq muxuu doonayey?
4. Buurta Daariq xaggee bay ku taallaa?

Casharka 5

## DAWOCO GAAJEYSAN



**Dawaco iyo digaag badan.**

Habar dugaag oo dhan, dawoco yaa u yar una dhagar badan. Maxay sidaas ku noqotay? Haddii aadan warkan hore u maqal, bal sheekadan akhriso, ka dibna waxa la arkaa inaad hadalkaas hore rumaysato.

Maalin baa dawaco gaajeysani aragtay beer digaag badani ku jiro. Beerta waxa ku wareegsanaa ood weyn oo meel yar oo keliya laga geli karo. Halkii bay ka gashay oo digaaggii siday doonto uga dheregtey.

Kolkay casar gaaban ahayd, ayay dawocadii damacday, inay beertii ka baxdo. Waxay istiri, «Beertan hilib digaag oo badan ku cunay, waxase ii haray hilib ari oo aan caawa helo». Kolkay meeshii yarayd ee furnayd istiri ka bax ayay kari weydey. Maxa yeelay, calosheedii oo buuxsantey baa meeshii furnayd ka bixi kari weydey.

Dawocadii intay geed hoostiis u hoyatey bay tiri, «Inta caawa ah, wax dambe beerta ka cunimaayo, maxaa

yeelay waxaan damcay inay calooshu yaraato, si ay u fududaato oo aan meesha furan uga baxo». Sidii bay yeeshay. Kolkay subaxdii ahayd, ayay si hawl yar dawocadii u baxday, illeen calooshii baa yaraataye. Markay beertii ka baxday, bay ku soo jeesatay beertii oo tiri «Beer yahay anoo gaajeysan baan ku soo galay,haatanna anoo gaajeysan baan kaa baxay».

**Layli :**

1. Magacyadan fal ka dhig:

   Gaajo, sheeko, buuxsamid, marnaan, hoyasho.

## Casharka 6
## XILKAS

Qof kastoo Somali ah xil baa ka saaran xagga dalka iyo xagga diintaba. Taas oo qof walba laga rabo inuu guto, si fiicanna uga soo baxo. Xagga dalka, qof walba waxa laga rabaa inuu dalkiisa jeclaado, inuu dhismihiisa ka qayb galo, inuu u dhinto haddii loo baahdo, inuu fiiro dheer u lahaado, aadna ugu fakaro horumarinta dalka iyo dhaqaalihiisaba.

Xagga diinta: qofkii nooliba waa inuu diin lahaadaa, qof kasta oo Islaam ahi, waa inuu wixii xun oo dhan ka dheeraadaa. Waxay diintu fartay waa inuu gartaa waxay ka reebtayna waa inuu ka reebnaadaa.

Ragannimadu waxay ku dhisan tahay in wax tar weyn loo lahaado dadka iyo dalkaba; gudihiisana laga shaqeeyo

si ay dadka noloshoodu u fiicnaato. Qof waliba markuu dalka tilmaamayo, waa inuu wax fiican ka sheega ee aanu liidin dalkiisa iyo dadkiisa toona. Waa inuu Eebbe ka cabsadaa, xeerka dalka u degsanna dhawraa oo u hoggansamaa. Dalkoo la jeclaadaa waa iimaanka barkiis. Markaas qof waliba waa inuu hawlaha dalka wax kasta ka hor mariyaa. Sidaas darteed, haddaad gurigaaga ka shaqayso dalkii baad dhistay; haddaad carruurtaada wax bartidna dalkii baad dhistay.

**Layli :**


1. Keen erayo ay ugu danbeeyaan «kii, tii».
2. Erayadan mid kasta weer geli.

   xilka, xeerka wixii, kaska , dalka, duunyada, liidin.
3. Waxaad qortaa adoo soo gaabinaya xilka kaa saaran waddanka.

> **«.... Qof la arkaa waa inuu ku kalsoonaadaa kartidiisa, waana inuu naftiisa oo idil u huraa shaqada horumarinteeda iyo wanaaggeeda .... Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliya, 23 Satembar 1971.**

Casharka 7

## MUUSKA



**Beer Muus ah.**

Muusku waa geed miro macaan badan oo dhuudhuuban leh. Wuxuu ka baxaa dalka kulul ee biyaha badan leh. Muuska Somalidu waa dhawr nooc, waxase u badan labo: midka lagu magacaabo «Jubba» iyo kan la yiraahdo «Booyow».

Geedka muuska dhererkiisu wuxuu gaari karaa saddex mitir, wuxuuna leeyahay caleen balballaaran oo dhaadheer.

Markuu gaaro sagaal bilood buu bislaadaa oo laga goostaan miraha. Mirihiisu waxay ku yaalliin gacan geedka ka laallaadda. Gacan walba waxa ku taxan miro ka badan 100 xabbadood.

Miraha muuska aad iyo aad baa looga cunaa addunyada. Maxaa yeelay, waxa laga beeraa dalal badan. Mirahaasu jirka dadka nuxrur bay taraan. Gaar ahaan Somalidu aad bay muuska ugu dadaasha, waxayna ku beertaa degmada Banadir iyo midda Jubbada Hoose, waana laba degmo oo Webiga Shabelle iyo kan Jubba ay maraan. Xagga dhaqaalaha guud ee dalka haddaan eegno, waxaan dhihi karnaa muuska inta waddanka gudihiisa lagu cuno haddaan la tix gelin, waxa dibedda loo dhoofiyo haddii la qiyaaso, waxa la dhihi kara boqolkii 45% waa muus keliya. Dalalka loo dhoofiyo waxa ka mid ah dalka Talyaniga iyo dalalka Carabta.

Dowladda Towraddu aad bay ugu dadaashay in muuska beeriddiisa la badiyo dibeddana suuqyo bay uga heshay si waddanka waxtar weyn uga soo galo, xagga dhaqaalaha ama qiimaha lacagta.

**Layli :**

1. Muusku dalakee buu u badan yahay?
2. Intee nooc buu kala yahay muuska Somalidu?
3. Dalalkee baa muuskeenna loo dhoofiya?
4. Hawadee baa ugu fiican bixidda muuska?

## Casharka 8


## GOOGAA CADALLEE

1. **Awr madoobi abaar qooq**
   **Dheriga**
2. **Wax dabran oo dooxan oo daaqa**
   **Maqaska**
3. **Col ku diley ciidan mood**
   **Qodaxda**
4. **Wax boqol ilig leh oo aan baruur karin**
   **Alool.**
5. **Hal caddi cayn ku jabtay**
   **Candhuuf.**
6. **Rooray rooray gaari waayey**
   **Hooska.**
7. **Beertay baax weyn badarkeed xantoob**
   **Timaha**
8. **Xaggu gebi xaggu gebi guntu walac**
   **Haruubka Caanaha.**
9. **Dundumo yar duumo kaa xoortay**
   **Lulada.**
10. **Libaax ku liq oo ku soo laba celi**
    **Aqalka madow.**

**Layli :**

Qor 5 googaa cadallee oo aan ahayn kuwa halkan ku qoran.

## Casharka 9
## A F R I K A




**Qaaradda Afrika**

Afrika waa qaaradda labaad xagga weynaanta, waana 11.000.000 Km. Afrika waxa ku nool 270 malyuun oo dad ah. Afrika dhammaan bad baa ku meegaaran. Waqooyi waxa ka xiga badda cad, bari waxa ka xiga badda cas iyo badweynta Hindiya, galbeed waxa ka xiga badweynta Atlantigga, Koofurna waxa ka xiga badweynta Hindiya iyo tan Atlantigga. Dad badan oo midabyo kala geddisan leh baa Afrika ku nool. Qaarkood waa ku dhasheen, qaarna waa degeen oo qaarado kale bay ka soo tallabeen. Dadka deggan Afrika waxa u badan dad madow. Dadkaasi, inta badan, waxay ku nool yihiin beero iyo xoolo, afaf kala duwanna way ku hadlaan.

Afrika waxay leedahay webiyaal waaweyn. Qaar aad bay u dhaadheer yihiin. Waxa kale oo ay leedahay xoolo duurjoog ah oo aan la koobi karin, kuwo dugaag ah, sida libaaxa, shabeelka dhurwaaga, wiyisha iyo maroodiga; kuwo ugaar ah, sida geriga, biciidka, deerada, garanuugta, farowga iyo shimbiro aad u midabyo qurxoon iyo daayeero kala waaweyn oo qaarkood halis dadka u yihiin.

Waxa dhacay in dadka soo tallabay Afrika u bixiyeen qaaraddii madoobeyd, iyagoo ula jeeda laba waxyaalood:

(1) iyagoo aan wax ka ogeyn gudaheeda.

(2) Dadka ku nool oo u badan dadka midabka madow.

Waxa dhacay, muddo dhawr boqol oo sano laga jogo, in Afrika dad shisheeye ahi ku soo duulay oo kala qaybsaday si ay u gumeystaan.

Gumeystayaasha waxa ka mid ahaa. Ingiris, Fransis, Talyani, Bortoqis iyo kuwo kale. Halgan daran, dhib iyo qasnaan iyo dagaallo badan ka dib, ayaa dadkaas Afrikanka ah intooda badani ay soo ceshadeen xornimadoodii iyo gobannimo buuxda. Afrika waa dal barwaaqo ah oo macdan aan la koobi karin leh. Waxa ka mid ah:dahab, lacag, maar, bir uraniyam, dheemman. naafto, bansiin iyo waxyaalo kale oo badan. Afrika markay xorowdey, madaxadeedu waxay garatay, inay urur ka dhexeeya, danahoodana ay kaga tashadaan samaystaan. Ururkaas waxa la sameeyey 24kii Oktobar 1945. Waxana lagu magacaabay «Ururka Midaynta Afrika». Jamhuriyadda Somaliduna waa ka mid, qayb libaaxna way ka qaadataa ururkaas.

**Layli : Su'aalahan ka jawaab**

1. Afrika intee bay le'eg tahay?
2. Sawir maabka Afrika.

## Casharka 10

## DAWLADDA HOOSE

Dawladda Hoose waa laan laamaha Taliska dawladda ka mid ah. Waxayna raacsan tahay Wasaradda Gudaha. Waxay leedahay xafiisyo, karraaniyaal, askar iyo shaqaale badan oo iyada u gaar ah.

Dawladdan hoose waa taliska magaalada gudaheeda. Hawlaha ay maamushana waxa ka mid ah magaalada hagaajinteeda, shatiyada (dhismaha, geddisleyda iyo wixii la mid ah) bixintooda, suuqyada nadiifintooda, cashuurta qaadisteeda iyo hawlo kaloo badan.

Iyadu waxay leedahay nin madax ah oo guddoonshe ka ah iyo xoghaye, gacanyare iyo guddi la taliye-yaal ah. Askarteedu waxay leedahay qalab u gaar ah oo ka duwan kan askarta kale. Dawladaha hoose ee magaalooyinku waxay kala leeyihiin soohdimo. Kuwaas oo ku dhisan maamulidda magaalooinka. Qofkii sharci-gaas ku gefana way ganaaxaan.

Xeerka dalka u degsani wuxuu dadka farayaa in dawladda hoose, booliiska iyo laamaha kalee dawladdaba hawlahooda lagu garab galo oo dalka horumarkiisa loo wada guntado.

**Layli :**

1. Dawladda hoose maxay qabataa?
2. Wasaraddee bay raacsan tahay?
3. Wax ka sheeg Dawlada hoose dadka ka shaqeeya?
4. Xeerarka u degsan wax ka sheeg?

## Casharka 11
## ABWAANNIMO

Nin baa beri addinka boogoobey. Markaasay boogtii aad u xumaatay oo muddo badan buktey. Faaliye iyo dhaye walba wuu u tegey oo waa laga quustay. Maalin dambe ayuu nin dadka daweeya u yimid oo boogtii tusay.

Markaasaa ninkii daweeyaha ahaa arkay inay boogtu xun tahay aadna u barartay oo caabuqday oo ninka intaas cuncunayso. Ninka bukaana, illayn waa nin jirrane, intaas addinkuu xoqxoqayaa.

Dhakhtarkuna nin caqli leh buu ahaa. Markaasuu is-yiri: «Horta si ninkaasu socodka u joojiyo meeshana faraha uga daayo falankeed qabo!» Markaasuu tusbax qaatay oo faal rogey.

Markuu faalkii rogey buu ninkii bukey si xun u eegay. Markaasaa ninkii bukey yiri: «Maxaad sida xun iigu eegaysaa»?. Markaasaa dhakhtarkii yiri: «Waxa faalku sheegay baan la yaabay». Markaasaa ninki bukey yiri: «Oo waa maxay» Markaasaa dhakhtarkii yiri: «Muddo afar iyo toban casho ah, baa laba gees oo kuwa biciidka le'egi kaaga soo baxayaan, adigoo soconaya ama taagan!». Markaasaa ninkii bukey naxay oo yaabay oo dhakhtarkii ku yiri: «Dawo aan labadaas gees iskaga cesho ma garanaysaa?» Markaasa dhakhtarkii yiri «Haa». Markaasa ninkii bukey yiri: «Oo waa maxay?» Markaasaa dhakhtarkii yiri:: Waa adoo had iyo goor labada gacmood madaxa ku haya oo labada gees hoos u cadaadiya, si aan geesihii kaaga soo bixin taagnaantana iska dhawra».

Markaasaa ninkii bukey fariistay oo labadii gacmood madaxa saaray oo hoos ugu cadaadshey. Markaasaa dhakhtarkii yiri: «Aniga boogta igu hallee oo labada gees uun iska dhawr oo gacmaha mar qur ah madaxa ha ka qaadin, hana kicin». Markaasaa ninkii bukey yiri: «Waa tahay». Markaasaa dhakhtarkii meeshii safeeyey oo dhidhkii ka xoqay oo dawo ku shubi jirey mar wal'ba laba goor. Markuu toddoba casho sidaas ku wadey baa boogtii bogsatey. Markaashaa dhakhtarkii ninkii bukey subixii dambe u yimid oo ku yiri: «Bal iska warran?» Markaasaa ninkii bukey yiri: «Boogtii bogsatey ee labadii gees baan ka baqayaa». Markaasaa dhakhtarkii yiri «Haddaba laba gees kaa soo bixi mayso e anigaa islahaa, meesha faraha ha ka daayo, socodkana ha iska daayo!». Markaasaa ninkii bukey iyo dadkii kaloo dhammi dhakhtarka caqli weynaantiisii iyo abwaannimadiisii la yaabeen.

Markaasaa ninkii bukey dhakhtarkii qaalin siiyey. Naag buraanburtayna, waxay tiri: Waa la kala maadiyaa meel buktiyo faraa».

**Layli :**

1. Erayadan tixo ku dar.
   Faaliye, Abwaan, Boog, Dhidh, Caabuq.
2. Dhakhtarkii muxuu kula taliyey ninkii bukey?
3. Sheekadan soo yaree oo qor.
4. Faaliyaha iyo dhakhtarka kee wanaagsan?

## Casharka 12

## GEEDDI BAABOW

Magaalada Buurxakaba waxa waa degeenaan jirey nin la yiraahdo Geeddi Baabow. Wuxuuna u ta'in jirey degmada magaaladaas u dhow. Hase yeeshee dadka badankiisu ma jeclayn mana oggolayn xukunka Geeddi Baabow. Inta yar ee oggolaydna wuxuu ka qaadi jirey cashuur.

Geeddi wuxuu kaloo lahaa 28 askar u ahayd oo ilaalin jirtey meesha uu seexdo iyo agagaarkeeda. Magaalada Buur u dhow dusheedana hog uu galo oo guri oo ka!e u ah, ayuu ku lahaa. Wuxuu kaloo lahaa mundul uu seexan jirey markii nabadi jirto. Markii colaadi dhacdana wuxuu geli jirey godkiisa.

Dadkii ku dhaqnaa degmada Buurxakaba, markay u adkaysan kari waayeen xukunkii Geeddi, ayay maalin dambe ka tashadeen sidii ay isaga qaban lahaayeen. Waxayna xoolo ugu ballan qaadeen gacanyarihii Geeddi Baabow oo la oran jirey Kume. Wuxuu Kume ku teliyey, «Qaansada Geeddi waxaan marin doonaa jifi oo waaxan ka shaqayn donaa si ay u jabto e, idinku berri ku soo duula».

Maalintii dambe ayaa dadkii ku soo duulay Geeddi Baabow iyo colkiisii. Kolkii dagaalkii bilowday ayaa

Geeddi qaansadii ka jabtay oo la dhaawacay, dabadeedna la qabtay oo la diley.

Intaanu dhiman oo naftu ka bixin buu dardaarmay oo yiri: «Kume waa kula joogaa koshiisuna way kaa jirtaa».

**Layli :**

1. Geeddi Baabow xagguu ku noolaan jiray?
2. Xukunka Geeddi dadku ma wada oggolaa?
3. Askarta Geeddi immisa bay ahayd?
4. Sidee baa loo dilay Geeddi Baabow?

## Casharka 13

## XAASKA

Xaas wuxuu yahay dad meel wada jooga oo dani ka dhaxayso. Wuxuuna ka dhismaa nin iyo haweeney is qaba, carruurta ay dhalaan iyo wixii kale ee soo raaci kara.

Hawlaha iyo arrinta xaaska, guud ahaan, waxay saaran yihiin ninka. Sidaas awgeed, isagaa laga rabaa inuu ka shaqeeyo sidii xaaskiisu ku noolaan lahaa. Haweeneyda hawsheedu kama yara tan ninka. Maxaa yeelay, xilkii hoose oo xaaska, iyaduu saaran yahay. Waxana laga rabaa inay hawsheeda si wacan uga soo baxdo oo mamulka gurigeeda iyo dhaqaalaha carrurteeda ay ka adkaato.

**Layli :**

1. Hawsha ninka xaaskiisa ka saaran sheeg?
2. Waa maxay hawsha naagta guriga ka saarani?
3. Dadku hadduu wax wada qabsado maxay helayaan?

## Casharka 14

## GURI MAGAALO



**Dhismaha guryaha magaalada**

Miyi iyo magaalaba waxa dadku leeyahay guryo ay ku hoydaan iyo alaab badan oo u taalla oo ay wax ku qabsadaan. Guryaha magaaladu, badanaa waxay ka samaysan yihiin dhoobo, dhagax iyo looxyo. Waxaana ugu qurux badan oo ugu adkaysan badan guryaha dhagaxa ka samaysan.

Guryaha magaaladu waxay leeyihiin qolal badan. Kuwaas oo qaar la seexdo, qaarna wax lagu cuno, qaarna wax lagu Kariyo, kuwana wax lagu akhristo. Waxay Kaloo leeyihiin musqulo, daaqad iyo beero ubax leh. Waxay kaloo leeyihiin albaabbo badan iyo deeriishado waaweyn oo gees walba Kaga yaalla.

Guryaha gudahooda waxa la dhigaa alaabo badan oo ay ka mid yihiin: sariiraha, kursiyada, miisaska iyo kuwo kale oo badan. Guryaha magaalada nadaafaddooda aad baa looga shaqeeyaa waxana lagu dadaalaa had iyo goor in la neecaabiyo oo la nadiifiyo oo qashinka iyo wasakhda laga dhawro. Waxa kaloo la hagajiyaa oo la nadiifyaa agagaarka guryaha iyo hareerahooda.

**Layli :**

1. Immisa qol bay u qaybsan yiihin guryaha magaaladu?
2. Wax ka sheeg alaabta guryaha magaalada la dhigto?
3. Beero ma leeyihiin guryaha magaaladu?
4. Maxaa guryaha magaalada loogu beeraa ubaxa?

**«Annagu ma nasan doonno ilaa dadka Afrikanka ah: ay ka xoroobaan gumeysiga midab gumeysiga, iyo imberiyalistahaba».**

**Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliya (1 Nofembar 1971).**

## Casharka 15

## HELLO FIIRO LEH

**Cirkaan dhidib hayn Allaa dherershoo**
**Intuu dhisay aanu dheeliyinoo**
**Daruurta ku dheehay dhoolka ahoo**
**Biyaa ku dhex jira dhalaalaayoo**
**Roobkoo dhibicaa ka soo dhaca oo**
**Dadkaa ka dhergoo xareedda dhurtoo**
**Ka dhaansada dhiilahoo maran**

**Dhirtii qallaashaa dharaar dabadeed**
**Caleen darabliyo dhimbiil noqotoo**
**Cagaarka dhashaa isdhalan roga oo**
**Dhuubkii ka dillacay dheer yahay.**

**Maalkii dhadhanshaa isdhiijinayoo**
**Dhiilkoo culan dhayda buuxinayoo**
**Dhallaanka hortiis aan cidi dhaminoo**
**Dhibtii hore layska dhaafaa.**

**Wax kale ma dhinnee Aamiin dhaha.**

**Layli :**

1. Heelladan baro oo ka faallee.
2. Ninka heelladan tiriyey muxuu doonayey?

## Casharka 16

## BANGIGU

Bangigu waa guriga lacagta la dhigto, si aanay u lumin. Waxa jira in dadka qaarkiis lacagtooda guryaha ay dhigtaan oo haddii gurigu gubto lacagtiina ku gubato. Dad baa lacagtooda intay daasad ku ritaan dhulka ku xabaala. Waxa dhacda in qofku hadhow garan waayo meeshii uu lacagta ku xabaashay oo ay sidaas kaga lunto. Intii dadku lacagtooda guryaha ku haysan lahaa, ama god ku xabaali lahaa, in Bangiga la dhigto ayaa ka fiican. Bangigu lacagta dadka wuu u hayaa oo meel aammin ah ayuu u dhigaa. Qofku markuu doono iyo intuu ka doono ayuu Bangiga ka qaataa, markuu keenona waa loo dhigaa. Bankigu dadka wax u yaalliin lacag uu siiyo ma waayo, maxaa yeelay markii qof lacag qaato, qof kalaa lacag dhigta. sidaasa lacagta dalka taalla oo dhammi Bangiga ugu wareegtaa.

Dhaqaalaha dalka, Bangigu qayb weyn buu ka qaataa. Qofkii raba inuu beer fasho, ama guri dhisto ama hawl kaloo dalku u baahan yahay qabto, bangigu lacag buu amaahiyaa. Markii muddadi loo qabtay dhamaato, qofkii amaahday waa inuu lacagtii soo ceshaa, Maxaa yeelay lacagtaasi waa tii dadweynuhu Bangiga dhigtay. Macaash yar ayaa boqolkiiba laga qaadaa qofkii Bangiga lacag ka deynsada.

Haddaanu macaash helin, Bangigu ma furnaaden; maxaa yeelay, dad badan oo mushahaaro qaata baa

Bankiga ka shaqeeya. Mararka qaarkood, haddi qofkii deynta qaata uu ku cayaaro lacagta, Bangiga waxay ku qasabtaa wuxuu hanti, mood iyo noolba leyeahay inuu ka xaraasho si lacagtii loo helo.

Waxa jira in Bangigu macaash siiyo qofkii lacagtiisa u deysta muddo dheer. Sidaas darteed bangigu waa macaashaa, waana laga macaashaa, wax kala gadashada addunkana isagaa maamula.

**Layli :**

**1. Erayadan tixo ku dar.**

Bangi, ilbaxnimo, lacagta, dhaqaale, wareegtaa.

**2. Ka jawaab adoo qoraya.**


1. Bangigu muxuu yahay?
2. Waa intee Bangiyada daldalkeena ka dhisani?
3. Haddad lacagtaada meel ku xabbalato sow lama mid aha adoo meel dhigtay?

**«.... Dhulkeenu dhibaato wuu ka gudbi karaa, haddi aynnu si aad ah u shaqaynno. Haddii aynnu dad kale kaalmo ka sugnana, innagu marna noolaan maynno. Isku kalsoonidu waxay inoo tahay hadaf iyo astaan».**

**«.... Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiqa Somaliya — (13 Oktobar 1971).**

## Casharka 16

# ISLAAMKA IYO SOMALIYA



**Masaajid weyn**

Haddii aan dib ugu noqonno taariiikhda, waxaan ogaan karnaa in Nabigeennii Suubbanaa ugu horreeyey qof faafiya Diinta Islaamka. Waqtigii Muslinku uu ku yaraa Maka, gaaladuna ay aad ugu dhibi jirtey, waxa jirey in Nabigeennu faray dadka asaxaabtiisa ah, inay ka tagaan Maka oo ay aadan meel diintooda ay ku dhawrtaan, Ilaahna ay ku caabudi karaan. Asaxaabta qaarba meel buu u safray. Qaar kuwaas ka mid ah, ayaa yimid dalka Somalida xeebihiisa, markaas bay ku faafiyeen Diinta oo ay bareen dadka Caqiidada Islaamka oo dhan. Sidaas daraaddeed waxa la dhihi karaa inay Somalidu tahay dadkii ugu horreeyey ee Diinta gaarsiin keliya ku qaatay ee aan seef lagu muslimin.

Markii Islaamku xoog yeeshay ka dib, waxa dhacay in dadka muslimka ah, ee degganaa Jasiiradda Carabta,

inay xiriir la yeesheen dadkii Somalida ee markaas degenaa xeebaha. Halkaas oo ay wax ku kala gadan jireen, diintana isku si u wada haysteen. Sida la wada og yahay Diinta Islaamku waa Diinta walaalnimada, mid ahaanshaha iyo isu naxariisashada. Dadka Diintaas haysta Ilaah hortiis waa isku mid. Dadkii dalka Somalida deggenaa oo dhan koox koox bay u soo galeen Diintii Islaamka, waxayna ku ballameen inay ku faafiyaan Diinta meel alla meeshii ay gaarsiin karaan.

Diintii way faaftay, Somalida keliyana kuma ekaan ee waxa soo raacay dadkii kale oo ay deriska ahaayeen. Taas waxa lagu garan karaa in dalka Soma'ida dhammaantiis laga heli karo Maasajiddo iyo Mawlacyo badan. Qof kasta oo Somaliyeedna sida badan magaalo ama miyi ha joogee, quraanka waa akhriyaa salaaddana waa tukadaa.



**Wiil quraan akhrinaaya**

Magaalada Xamar iyo magaalooyinka waaweyn oo kale, waxa lagu arki karaa masaajiddo qurqurxoon oo minaarado dhaadheer leh oo muddo fog la dhisay. Kuwaas waxa ka mid ah: Masaajidka Fakhrudiin, Arbaca Rukun, Jaamacadda Xamar Weyne Iyo Masaajidka Cabdulcasiis.

Somalidu markii ay dawlad noqotay, waxay xoog u yeeshay xiriirkii Diinta ee ay la yeelatay dawladaha iyo dadadka Muslinka ah ee adduunyada ku nool. Somaliya waa waddanka keliya ee la oran karo in dadkiisu boqolkiiba boqol Musilm yahay.

**Layli :**

1. Yaa Diinta Muslmika soo gaarsiiyey dadka Somalida?
2. Somalidu sidee bay Diinta u qaadatay, haddase sidee bay ku tahay?
3. Masaajiddada dalka ku yaalla intooda dà weyn ee dadkii hore dhiseen magacyadooda qor.

## Casharka 17

## SHIQLEY

Shiqleydu waa shimbir yar oo beeraha meeseggada cunta. Shiqleydu koox koox bay isu raacdaa, waxayna ku dhashaa webiyaasha goonyahooda. Shimbirahaasi guggi bay dhalaan, xagaggiina way isu soo ururaan. Kolkaasay meel alla meeshii beeri ku taallo aadaan.

Shiqleydu beeraha meseggada leh bay cuntaa, kuwa galleydase ma cunto. Beeraleyda meseggada abuurata aad

bay u neceb yihiin shiqleyda, wayna u hub samaystaan xilliga meseggadu u baxdo.

Qalabkay shimbirahaas iskaga celiyaan waxa ka mid ah: Raar ay dhisaan oo ay fuulaan, burgen, dhayle, waraf iyo alaab kaloo badan oo ay shimbiraha ku cabsi geliyaan.

Sannadkii ay shimbiruhu aad u bataan, wax kastoo la sameeyo sina shiqleyda loogama dhicin karo beeraha. Sannadkaasoo kale, beeraha meseggo lagama goosto ee xoolahaa lagu sii daayaa oo balka ka cuna.

Beeraleyda sannadkaasi waa u abaar, maxaa yeelay, beerta wax ay cunaan kama helaan.

Shiqleydu sunta ayaxa kuma dhimato oo beeraleydu weli may helin wax ay shimbirtaas kula dagaallamaan. Shiqleydu, sida shimbiraha kale, maalin mooyee habeen ma duusho.. Waxayna u hoyataa dhulka jiqda ah ee geedaha badan leh.

Shiqleydu waxay leedahay buul sida shimbiraha kale. Buulkaas qoryo yaryar iyo caws ay isku cuftay ayay ka samaysataa. Buulkaas waxay ka soo laalaadisaa dhirta laamaheeda.

**Layli :**

1. Waxad sawirtaa «Shiqley» ka dibna wax ka qor tilmaanteeda.
2. Waxaad sheegtaa sida beeraha looga celiyo shimbiraha.
3. Beeraleydu shiqleyda maxay u neceb yihiin?

## Casharka 18

## ILAHA BIYAHA

Waxa il lagu tilmaamaa way badan yihiin; waxaanse hadda ka hadlaynna ilaha biyaha ee dhulka ama dhagaxa ka soo baxa. Ceelasha iyo durdurradu waxay leeyihiin ilo biyo ka soo baxaan. Ilaha biyuhuna waa kala jaad. Ilo ceel la qoda ka soo baxa iyo ilo durdur ah oo dhadhaab buqday ka soo baxa.

Ilaha biyahoodu waa kala dhadhan: il biyo macaan leh, mid biyo dhanaan leh iyo mid biyo qaraar leh. Biyuhu cabbista way ku kala fiican yihiin. Sidaas daraaddeed, qaar waa xareed macaan oo waa biyaha cirka ka soo dhaca, qaar waa wiyeer dhadhan culus oo waa biyaha ceelasha la qoday, qaarna waa ajo aan la cabbi karin oo waa biyaha yar ee wasakhooba.

Dalkeenna waxaa ku badan magaalooyin ilo biyo ka soo baxaan leh. Waxaa jira biyo ilood oo aad u badan oo beero lagu waraabsan karo sida «Isha Baydhaba» oo kale.

Magaalooyinka ilo biyood leh waxaa ka mid ah: Dhinsor, Eyl, Baydhaba, Cerigabo, Iskushuban iyo kuwo kaloo badan.

**Layli :**

**Waxaad kala tilmaantaa erayadaan.**

1. Ceel, durdur, tog, webi, il.
2. Iluhu immisay u kala baxaan?
3. Dhadhanka biyaha ee kala geddisan sheeg?
4. Biyuhu immisay u qaybsamaan?

## Casharka 19

## BAKHAYL HA NOQON

Beri baa waxa la yiri, nin ayaa reer u soo hoydey. Markaasaa reerkii ka seexday. Subixii markii waagu beryey baa ninkii martida ahaa kacay oo ninkii reerka lahaa u yeeray. Markaasaa ninkii reerka lahaa qolqolka isa soo taagey. Ninkii martida ahaa wuxuu ku yiri ninkii reerka lahaa oo ka seexday. «Haddaad ninyohow og tahay, marka soor la iigu yimaaddo sidaan wax uga bixiyo iyo marka la i siiyo intaan ka cuno iyo markaan waayo sidaan uga adkaysto, xalay iga ma seexateen!!.» Intaas markuu yiri buu ninkii martida ahaa iska tegay. Markaasaa ninkii bakhaylka ahaa tiiraanyooday.

## Casharka 20

## DOOD HABLOOD

Laba hablood oo yaryar oo ari la jooga, ayaa maalin isu faanay. Waxay isugu faaneen aabbaahay baa fiican iyo abbahay baa fiican.

Mid baa tiri, «Aabbahay rag oo dhan buu ugu sitaa!» Markaasaa tii kale tiri, «oo haatan ma waxay kula tahay inuu aabbahay ka sito?». Markaasay tiri, «Haa». Markaasay itri, «Bal ii sheeg siduu uga sito?» Markaasay tiri, «wuxu uga sitaa intuu ragannimo ka qabo, dhul kala dillaacayna waysku kabi karaa!».

Tii kalaa yaabtay oo intay cabbaaar aamustay tiri, «Naa hooy gabar yahay, hadduu aabbahaa dhul kala dillaacay isku kabi karo, waa nin rag ah, ha yeeshee

aniga meesha aabbahay joogo dhulkuba kama kala dillaaco ee wuu baajiyaa!!».

**Layli :**

1. Labada gabdhood midee faan badnayd?
2. Sheeg midba waxay midda kale ugu faantay?

## Casharka 21

## LABADII TUUG

Waa baa waxaa jirey laba tuug oo ka dhammeeyey duunyadii dadka ay wada degganaayeen. Mid wuxuu ku noolaa degmada Marka, kan kalena degmada Barawe. Labada tuug warkoodii meel walba wuu gaarey oo dadkii waxay ogaadeen xumaanta ay leeyihiin.

Tuuggii Marka ayaa wuxuu doonay inuu barto tuugga lagu sheegay Barawe. Markaasuu dameerkiisii ku raray jawaan uu ka buuxiyey digo ari, korkana wuxuu kaga shubay murxo buneed, xagga Barawena waa u safray. Illeen tuuggii Barawena taladaas oo kale baa ku dhalatay oo intuu jawaan dambas ka buuxiyey, ayuu korka bur kaga firdhiyey, dameerkiina soo rartay. Xagga Marka ayuu so aadey, isaga oo jecel inuu barto tuugga beleda ah oo Marka lagu sheegay. Labadii tuug jidka bay iskaga hor yimaadeen. Way isnabdaadiyeen. Midba midka kale wuxuu weydiiyey badeecada uu wato. Markaas baa kii Marka yiri, «Anigu bun baan wataa». Kii Barawena wuxu yiri «Anigu bur baan sitaa». Ninba ninka kale buu doonayey inuu khayaano. Dabadeed waxay

ku heshiiyeen inay is ch33fsadaan labada dameer iyo labada jawaan

Kolkay kala wareegsadeen hoggaankii dameerrada bay kala tageen. In yar markuu socday ka dib, ayaa mid waliba dhaqso u furay jawaankii isaga oo ay la tahay inuu dhagray kii kale. Laakin labadoodii way isdhagreen! Markaas ayaa mid waliba uu gartay dhagartaas oo ka'e inuusan u samayn karin tuuggii uu raadinayey mooyee. Dhaqso ayay isugu soo noqdeen waana iska hor yimaadeen mid waliba isaga oo qoslaya. Markaas bay si fiican isu salaameen, waxayna ku ballaameen inay wada jir wax ku wada xadaan, laakin dhagar baa midba midka kale uurka ugu hayey.

Labadoodii way is raaceen waxayna yimaadeen magaalo nin hodan ah uu joogo. Waxay ogaadeen hodanku inuu dahab badan leeyahay. Ninkii bay shaqo weydiisteen si ay ku ogaadaan meesha dahabku ugu jiro. Shaqadii baa la siiyey, waxaana loo sheegay in mushaharka toddobaad walba la qaato. Dadka shaqaalaha ahi markii ay toddobaad shaqeeyaanba, nin waliba wuxuu tagaa meel khasnad ah oo gacanta la gashado, si uu u soo qaato mushaharka. Maxa ku dhacay labadii tuug? Iyagu kama ay war qabin in xaalkooda lala socdo. Markii ay yimaadeen khasnaddii ayaa tuuggii Marka gacanta midigta ah uu ku ritay, si uu u soo qaato mushaharkiisii. Markaas ayaa dhankii kale bir gacanta looga gooyey. Gummudkii oo duuban ayuu la soo noqday, wuxuuse ku

yiri saaxiibkiis, «War wax badan noo soo qaad oo labada gacmoodba wada gasho». Markaasuu labadii gacmood wada gashaday khasnaddii. Isla markiiba labadii gacmood baa bir isna lagaga gooyey.

Tuugo iyo khayaano waxaa u danbeeya hoog.


**Layli :**

**Ka jawaab adoo qoraaya erayadaan.**

1. Labada tuug xaggee bay ku kala noolaayeen?
2. Midba muxuu la safray?
3. Labadii tuug aakhirkii maxaa u danbeeyey?
5. Tuugo iyo khayaano maxay dhalaan?

## Casharka 22

## CAYAARAHA



**Cayaaraha jirka**

Waxa la ogsoon yahay in dadku cayaaro u baahan yahay. Cayaaruhuna waa badan yihiin, waana kala duwan yihiin. Cayaar kasta ha noqotee, jirka dadku yar

iyo weyn rag iyo haween, qof kasta waa u baahan yahay inuu caayaraha qayb ka qaato.

Cayaaraha waxa laga helaa waxtar weyn, waxaana ka mid ah in qofka cayaara ay seedaha Jirkiisu adadkaadaan, dhiiggiisuna uu kordho. Dhaqdhaqaaqa jirkuna wuu xoogeystaa si uu cudurada isaga celiyo. Dhakhtarradu way kula taliyaan dadka inuu cayaaro.

Midda labaad cayaaruhu waxay na tusaan sida ku habbon edebta ismaqalka. Waxaa kaloo cayaaraha laga bartaa dulqaadashada, waxayna dadka ku abuuraan furfurnaan iyo istaageerid. Sow ma aad arag marka kubbadda la dheelayo, qolada kolba si habbon u ciyaarta oo si fiican kubbadda isugu dhiibtaa, inay si hawl yar libta u gaari karto.

Intaas waxa u dheer, inay cayaartu nafta u tahay madadaalo qofkana nooga ka bi'iso' weliba intaas waxaa sii raaca inay hamuun u yeesho qofka. Qaybaha cayaaruhu waxay waxyaalo badan u taraan carruurta iyo dhallinyaradaba. Cayaaruhu way badan yihiin oo waxaa ka mid ah: kuwo maalmaha iidaha la cayaaro, kuwaasoo iyaguna si gooni ah loogu raaxaysto. Waa hore waxaa la yiri, «Caqliga fayoobi wuxuu ku jiraa jirka fayow».


**Layli :**

**Erayadan magacyo ka dhig .**

Dhaqdhaqaaq, fayow, gooni, fiican.

## Casharka 23

## BOOSTADA



**Boostada Xamar**

Boostadu waxay qaaddaa oo keentaa warqadaha dadku qoraan, dal kasta ha joogeene. Sida telefoonka iyo wargeyska, ayaa boostadu door weyn ka cayaartaa warfaafinta dunida maanta. Telefoonka iyo siinka war kooban ee aan badnayn baa lagu diraa, wayna qiima babadan yihiin. Intii eray oo aad ku hadasho, ama muddaadii aad hadasho intay tahay, baad lacagteeda bixisaa. Haddaad 5 daqiiqo telefonka kula hadashid qof Kismayo jooga, 20 shilin baad bixisaa. Sidaas darteed, warfaafinta telefoonka iyo siinku waa qaali, maxaa yeelay, dawladdu alaabtaas sameynteeda lacag badan bay ku bixisaa.

Boostada warqadaha iyo xirmooyinka yaryar baa lagu dirsadaa, lacag aan badnayna waa la bixiyaa. Waxaad guud kaga qori kartaa in ka badan intaad telefoonka ama siinka ku sheegto. Haddaad doonayso inaad warqad u dirtid qof jooga shanta qaaradood middood adoo jooga Xamar, lacag yar ayay boostadu kaa qaadanaysaa.

Sidaas darteed, qiimaha boostadu warqadda ku qaaddo wax badan buu ka jaban yahay telefoonka iyo siinka lagu bixiyo. Inkastaba, boostadu warqadaha qaadidooda iyo keeniddooda way la raagtaa.

Bostada qaadiddeeda waxaa u dhigan xeer ka dhaxeeya dawladaha.

Sidaas waxaa ku jirta dal kasta dantiisa, maxaa yeelay waa la kala war helaa. Kala macaashka iyo aqoontuna way ku fidaan. Sidaas darteed, boostadu had kasta way ka tallaabtaa oo gaadiidka adduunka oo dhan baa gura.

Qofkii raba inuu warqad boostada ku diro, waa inuu xusuusto xeerka boostada u dhigan ee madhaafaanka ah. Xeerkaasi waa in la muujiyo:

1. Magaca qofka loo dirayo warqadda iyo meeshuu ku sugan yahay.
2. Magaca qofka diraya warqadda iyo meeshuu ku sugan yahay. Tilmaanta hore waa in lagu qoro baqshadda boggeeda sare, tilmaanta dambena, waa in lagu qoro baqshadda boggeeda hoose. Waa inay dhigmadu aad u muuqato si loo garto.

Labadaas tilmaamood la'aantood boostadu ma ogaan karto qofkay u socoto iyo kay ka socoto warqaddu. Taasoo kale waxa la yiraahdaa (warqad dhegalà).

Qodobka saddexaad waa in warqadda tigidh lagu dhejiyo. Taasoo ah astaanta muujinaysa inuu bixiyey kiradii boostadu waraqdda ku qaadi lahayd. Tigidhka qiimihisu wuxu ku xiran yahay warqadda ama xirmada la dirayo culayskeeda. Haddi qofkaad warqadda u dirtay kuu soo jawaabo, boostadu gurigaaga bay jawaabta kuugu keenaysaa ama sanduuqaaga bay kuugu ridaysaa.

Sidaas darteed, boostadu hawl lama huraan ah ayay dadka u qabataa oo wa xubin ka mid ah laamaha warfaafinta ee adduunka.

**Layli :**

**1. Erayadan hadal u gaar ah ku dar.**

Boostada, telefoon, taar, qaali, hawlahaas, ilbaxnimo.

## Casharka 24

## SOMALIGA WADANIGA AH

Annagu haddaan Somali nahay waajib baa dalku innagu leeyahay, innaguna xuquuq baynu dalka ku leenahay. waxaa jira dad badan oo had iyo goor doonaya xaqooda oo aan ka murgeyn waajibka laga rabo, labada waxyaalood waa inaynnu kala saarnaa.

Xuquuqda aan leenahay waxaa ka mid ah:

Xornimo inaan waddankeenna ugu noolaanno; innaga oon xeerarka dalka u dhigan wax u dhimin.

Dalka meeshii aan doonnno waa inaan ka degnaa ama aan u safarnaa.

Gabadha ama wiilka Somaliga ah, qof waliba waa inuu ka shaqeeystaa waddankiisa iyo shaqada uu isagu jecelyahay haddaan xeerarka waddanku u diideyn. Dadka Somalida ah dalkooda beero, daaro iyo tacab kale bay ku yeelan karaan, wax qaynuunku ka reebo maaha e.

Qofka Somaliga ah xornimo wuxuu u caddeysan karaa rayigiisa, wargeyskana waa ku qori karaa, haddii talooyinkiisu ayan ahayn kuwo wax u dhimi kara dalka iyo dadka.

Qofka Somalida ah Ilaahiis xornimo ayuu ku caabudi karaa, haddii aanu la iman wax qas iyo khaakhuul dadka gelin kara.

Somaliga waxa laga rabaa:

Xeerarka waddanka inuu u hoggaansamo.

Inuu shaqeeyo oo wixii waddanka noloshiisa ah uu ku dhaqaaqo, shaqadiisana daacad u ahaado. Dadka Somalida ah waa inuu xuquuqdiisa dhawraa oo aanu ku xaq gudbin.

Cashuurta waa inuu dhiibaa, waa inaanu la baxsan ama khayaanayn. Qofka Somaliga ahi waa inuu noqdaa askari, si markii loo baahdo uu diyaar u ahaado.

Isagu waa inuu ka qayb galo hawlaha iskaa wax u qabso, iyo hawl kasta oo waddanka waxtar u yeelan karta.

**Layli :**

1. Saddex qodob ka sheeeg waxyaalaha Somaligu uu xaq u leeyahay.

## Casharka 25

## KUMAAN AHAY

Ma i taqaan? Haddaadan i aqoon i baro. Hoygeygu waa samada, midabkayguna caddaan lacagta u eg. Habeenkii baan muuqdaa, dharaartiina waan qarsoomaa haddaba ma i garatay? **Xiddigaha**

Dadku anoo yar bay i arkaan bil kasta horraanteeda, kolba waan weynaadaa oo weynaadaa intaan ka gaaro qaangaar, dadkuna si weyn bay iigu soo jeedaan....

Haddaba ma i taqan? **Dayaxah**

Addiguse ma i taqaan? Waxaan kuu malaynayey arday kas leh oo fiiro gaar ah u leh waxyaalo kasta! Kolkaad yarayd, korkaygaad ku kortay, dhuuniga dushayda yaal baad ku kortay, biyahaygaadna ka cabtey, oogadaydana laba webi biyo macaan leh baa dul qulqula. Haatan ma i garatay mise aad baan isugu kaa sheegaa? ..... Dhul ahaan waxaan u qaybsamaa shan gobol, labo way kulantay waana xorowdey. Intee baa maqan? Adigu waad i jeceshahay waadna ii dhimataa, sidaad ii illowdana waa dheer tahay. Hawl weyn baad haysaa, waadnaa ku guuleysaneysaa. Haddaba kumaan ahay? **Somaliya.**

1. Anigu macallinbaan ahay,
   Sidaas waxaad ka garan hadalkayga
   Qofse ma aan ahi

Carrabna ma aan lihi
Amarkayguse waa weyn yahay
Tilmaantaydaad ka garan
Ardadana waan la jiraa
Saaxiibnimo baa na dhex taal
Mana kala maarannee kumaan ahay?

2. Wax boodoo bilig yiri
Buul sintii ka garab baxay,
Aan bidhaantiis la arag,
Wuxuu yahay sheeg!

**Layli :**

1. Isku day inaad marka hore garatid waxay kala yihiin labada sheeko dabadeedna qor.
2. Xujo sheeg ka dibna bal qor mid walba adoo tilmaan ay leedahay sheegaya.
3. Sheekooyin xujadan oo kale leh madaxaaga ka samee.

## Casharka 26

## MA OG TAHAY

Xabibo iyo Farax waa laba carruur ah oo walaalo ah. Duggsiga hoose bay labaduba ku jiraan. Labada carruur ah, xagga dhigashada iyo dadaalka, tartan weyn baa ka dhaxeeya. Waalidkood iyo dugsiguna sidaas bay ku og yihiin. Carrurtaasu buugagga dusiga oo keliya ma akhristaan ee wax kasta oo buug ku qoran ama joornaal

ku yaal ama wargeysyo ku soo baxaba, waa akhristaan. Wixii cusub ee barasho lehna waxay ku qortaan buug u gaar ah. Maalin ay isu faaneen baa mid kasta kan kale uu tusay buuggii u gaarka ahaa ee ay ku magacaabeen «Ma og tahay». Xabibo waxay qortay waxyaalo ay si gooni ah uga fiirsatay.

1. **Cayayaanka:** Intooda badani lix lugood bay leeyihin. Jirkooduna saddex qaybood buu yahay.
2. **Jiirka:** Markay koox meel ka guurto, midka weyni waa hor galaa, kuwaa yaryarina midba kan kale buu dabada qabsadaa sida awr isku xiriirsan.
3. **Mukulaashu:** Kolkay habeen tahay si weyn bay wax u aragtaa. Waxay leedahay xoqado dhaadheer. Mukulaashu siday raaxada u jeceshahay haddaadan ilaalin, waxa la arkaa inay sariirta kaaga horrayso.
4. **Xuurtu:** waa shimbir aan inta badan duulin, sida gorayada. Xuurtu dabaasha iyo mayrashada si gaar ah bay u jeceshahay. Xuurtu waa caato, maxaa yeelay waxa la yiri mawdkay aragtaa.
5. **Lo'da:** Sucu markuu kacayo, isagoo labada addin ee hore dhulka ku haya, buu labada lugood ee danbe mar wada qaadaa. Kolkuu wiilkii buuggaa walaashis Xabibo intaas ku arkay, buu isna kiisii la soo baxay. Waxyaalahan baa ku yiil·

1. **Libaaxu:** Wuu dheereeyaa wuuna boodaa. In kastuu dugaag yahay, haddana waa nadiif.

Hilibka qurmay ma cuno, inuu gaajoodo mooyee waxna ma dilo, haddaan lagu kibrin.

2. **Dhurwaagu:** Waa doqon deeqsi ah. Markuu neef dilo oo uu ka dhergo, ayuu inta harta, bahallada kale ugu dhawaaqaa.

3. **Shabeeelka iyo Haramcadku:** Labaduba baro ayay leeyihiin. Shabeelku waa nadiif, haramcadkuse waa bakhti cun.

4. **Corayadu:** In kastay weyn tahay, doqon baa lagu sheegaa; wayse cayaar badan tahay, wayna cayaar wanaagsan tahay.

**Layli :**

1. Adigu haddaadan buuggaas oo kale lahayn, isku day inaad sidooda mid kasta sawirto.
2. Buug xusuuseed samayso oo yax ku qor.

## Casharka 27

## LA JIIFIYAANA BANNAAN

Waxa la yiri, nin baa meel garsoore u ahaa. Sac baa beer daaqay. Markaasaa ninkii beerta sacu daaqay lahaa, garsoorihii u soo ashtakoodey.

Markaasaa gasoorihii xukun bixiyey oo yiri intuu ushiisii kor u qaaday, «Ninkii saciisu beer nin kale leeyahay daaqo, ushaas buu haruur ku qarinayaa».

Maalintii dambe ayaa garsooraha qudhiisu sacuu leeyahay beer daaqay. Markaasaa garsoorihii loo shegay oo la yiri, «Maanta sacaagii baa beer daaqay».

Markaasaa garsoorihii yiri, «Usha haddii la jiifiyana bannaan».

**Layli :**

1. Magacyadan Jamac ka dhig:

   Beer, Sac, Nin, Ul, Naag, Qalin, Geed, Buur, Dhagax, Duq.
2. Garsooruhu caadil ma ahaa?
3. Hadalladiisii wax ka sheeg.

## Casharka 28

## SEKADA

Sakada waa in ninkii xoolo haystaa uu wax ka huraa oo siiyaa dadka saboolka ah iyo kuwa masaakinta ah. Sekada waxaa ku sugan dadka oo iskaalmeeya, isla markaasna qofku wuxuu gudanayaa waajib Ebbe faray.

Nebigeennii suubbanaa wuxuu yiri: «Maalkiinna ka bixiya sekada, maxa yeelay Sekadu waxay ka saartaa naftiinna bakhaylnimada, xooluhuna way ku tarmaan». Sekadu dadka iyo duunyadaba way daahirisaa.

Sekadu waxay u kala baxdaa labo:

1. Sekada qofku uu ka bixiyo naftiisa.
2. Sekada qofku uu ka bixiyo malkiisa iyo xoolihiisa.

Midda nafta laga bixiyo, horay baad u maqashay

waana midda la bixiyo ayaanta u horreysa iidda Soon-Furta, ama bisha Soonqaad. Qofkuna uu ku bixiyo firi ama cunno dheef leh, uuna ka bixiyo naftiisa iyo xaaskiisa.

Tan labaad waa midda qofku sannad walba uu ka bixiyo maalkiisa: Mood iyo Noolba.

Yaa laga rabaa Sakada inuu bixiyo?

Sekada inuu bixiyo waxa laga rabaa qofkii hanti leh, muslin ah, xor ah, qaangaar ah oo wax garad ah.

Intaas qofkii aan ahayn wax ma bixinkaro. Ha yeeshee haddii isaga ay ku wajibtey, waxa ka bixin kara qofka wakiilkiisa ah oo isaga dhaqaaleeya. Quraankeennu wuxuu caddeeyey ninkii isaga oo heli kara, diida Sekada inuu bixiyo, islaan ahayn addunyada khayr arki maayo, aakhirana naar kulul baa u dambaysa.

**Layli :**

1. Sakada kala tilmaan.
2. Ninkii hanti leh goormaa Seko ku waajibtey?
3. Ninkii Sekada diidaa maxuu yahay, maxaase u dambeeya?

## Casharka 29

## TELEFOONKA

Gaadiidka iyo warfaafinta cusub ee haatan lagu dhaqmaa, waxay dhab u soo dhoweeyeen fogaantii iyo muddadii oo kala socon jirey laba dal, ama laba meelood. Sidaas darteed, waxa la yiraahdaa dunidii waa

soo dhawaatey. Alaabada warka faafisa ama meel gaarsiisa, waxaa ka mid ah taarka, telefoonka, wargeyska raadiyaha, telefishanka iyo kuwo kale Alaabadaas mid



**Nin Telefoonka ka sheqeeya.**

walba midka kale ka yaab badan, mid kastana waxtarkiisa lama koobi karo. Horukaca qarniga labaatanaad la gaarey, ma jireen farsamdaas la'aanteed, horumarka aqoontuna heerkuu haatan joogo ma gaareen

Çofkaan ogeyn in xoog eletrikada ku jiro ma garan karo farsamada iyo sida telefoonku u shaqeeyo. Nin Maraykan ah ee la yiraahdo Aleksandar Graham Bell, ayaa hindisey telefoonka 1875. Aleksander wuxuu ogaadey in xoogga eletrikadu siligaa dhex mari karo. Ninkaasu wuxuu kaloo gartay, in xoogga elektrikada ee hawada sare oo dhan ku galoolani innu codka dafo, sida dabayshu u qaaddo baalasha shimbiraha, xaashida iyo waxa fudfudud oo dhan· Sidaas darteed, labada qof ee telefonka ku wada hadlaya, codkooda siligga ayaa dafa oo qofba codkiisa kan kale dhegtiisa ku rida. Sidaasay laba qof isu maqli karaan.

Telefonku qayb weyn buu ka qaatay xagga warfaafinta oo warqaddii laysu qori jirey, ama farriintii laysu diri jirey, sida badan, telefoonka ayaa beddeley. Adqo Xamar jooga, Kismayo ama meel ka fog, baad qof kale telefoon kula hadli kartaa. Sidaas daraaddeed, telefoonku taarka ka dhaqso badan. Tiirar la taago tan iyo Kismayo iyo silig ku taxan baa telefoonku u baahan yahay.

Shaqada xafiiska iyo guryaha wax weyn buu ka taraa telefoonku. Ninka xafiiska u taliya, isagoon kursigiisa ka kicin, ayuu wada fari karaa dadka ka hoos shaqeeya. Haddii guri gubto, ama qof bukoodo telefoon baa la diri

karaa, si ciidanka dabka damiyaa ama dhakhtarku degdeg ugu yimaadaan meeshii dhibaatadu ka dhacday.

Telefoonku sidaasuu waxtar weyn ugu leeyahay nolosha iyo horumarka dadka. Ninkii hindiseyna, dadnimadeenna ayuu sare u qaaday.

**Layli :**

1. **Erayadan magacyo u rog.**

   fog, yahay, farsamee, aqoonso, hindisey.

2. **Kuwanna fal ka dhig.**

   Hurumarka, qaadis, shaqada, taagnaan.

3. Aleksander Graham Beil, muxuu ku kordhiyey telefoonka?
4. Taarka iyo telefoonku maxay ku kala duwan yihiin?

Casharka 30

# WARSHADDA SONKORTA



**Sida sonkorta loo sameeyo**

Marka subixii hurdada laga tooso, dadku dal kasta ha joogee, shaah ama qaxwe (Kaffee) ayay caabban. Hase yeeshee, inta shaaha cabta ayaa tiro badan.

Somalidu waxay ka mid tahay dadka shaaha aad u cabba. Ugu yaraan maalintii saddex goor, subixii, galabtii iyo fiidkii, yaa Somalidu shaaha cabtaa. Sidaas darteed, lacag aan yarayn baa dawladdu ku bixin jirtey caleenta shaaha iyo sonkorta dalka oo soo dhoofiyo. Shaahu waa sonkor iyo Caleen laysku daray oo biyo lagu kariyey. Sonkorta iyo caleenta shaahana, midba goonni baa loo beeraa.

Somaliya waxa leedahay wershed sonkorta soo saarta, si aan sonkor dibedda looga soo gadan. Wershedda

sonkortu magaalada Jawhar bay ku taal, waxana la dhisay 1926. Waagii hore, wersheddaas shisheeye ayaa lahaa, haatanse dawladdaa la wareegtay. Sannadkiiba shan boqol oo kun (500.000) oo kiintaal oo sonkor ah, ayaa warshaddu soo saari kartaa. Sonkortaasi dalka waa ku filan tahay oo haatan Somaliya sonkor dibedda kama soo iibsato. Lacagtii badnayd oo waagii hore, sonkorta lagu soo gadan jirey sidaasay dalka ugu dhaqaalowdey.

Sonkorta qasabkaa laga sameeyaa. Qasabkana waa la beeraa oo biyo badan buu u baahan yahay. Sidaas darteed baa warshedda sonkorta webiga agtiisa looga dhisay. Waro waaweyn oo biyaha kaydiya, ayaa warshaddu leedahay, si ayan marna u biyo waayin. Markay laamaha qasabku baxaan oo gahayr noqdaan, baa la soo jaraa. Makiinadda loo sameeyey baa laamaha qasabka shiidda oo dhacaanka ka tuujisa. Dhacaankaas oo biyo u eg baa weel lagu shubbaa. Markii muddo la joogo yaa dhacaanku engegaa oo iniino cadcad oo kale noqdaa. Sonkorta samaynteedu waa hawl badan tahay.

Wershedda sonkortu waxay kaloo soo saartaa alaabo kale oo waxtar weyn leh. Alaabtaas waxaa ka mid ah, Aalkol oo aad looga isticmaalo isbitaallada, barafunna laga sameeyo.

Alaabtaas dalka dhexdiisana waa lagaga isticmaa'aa, dibeddana waa loo dhoofiyaa.

Wershedda shaqaale afar kun iyo dheeraad ah, ayaa ka xoogsada oo ku nool. S:daas darteed, wershedda sonkortu, qayb weyn bay ku leedahay dhaqaalaha dalka.

**Layli :**

1. **Erayadan tixo geli.**

   hurdada, shaah iyo qaxwe, caleen, wershed, kiintaal, shiidis, dhacaan.

2. Waxaad qortaa koob shaah ah sida loo bisleeyo.
3. Sonkorta maxa laga sameeyaa?
4. Goormaa wershedda sonkorta dawladda Tawriga ahi la wareegtay?

## Casharka 31

# AMMAANTA GEELA



Geela

Gù saranseeray roobkoo ku simay, Sudiyo Garodi,
Saqda dhexe haddii lagu lallabo, socotadii geeddi,
Korammada sagaal jirey haddii, keeno lagu sayro,
Aqallada sintoodii haddii, sibirta loo laabo,
Qarqarsia haddii lagu shakalo, sayn caddaha dhaartay,
Waa wuxuu ilaahay sandahay, saad u eegtoba è,
Samay markaad tiraahduu arxaha, sare u qaadaaye,
Surradda iyo ubbada teedsaniyo, saabka iyo haanta,
Siddeed loola iyo tiirka iyo, saamihii Adari.
Intaasaa la wada saarayaa, saayid weheshaaye,
Siqiirkiyo carruurtana guray, uga sameeyaane,
Goortaa suryada loo baxshuu, sare u boodaaye,
meeshiyo salaaddiyo harkuu socod u jeedaaye

salligiyo wax lagu caawiyaa suuradaa adage
Dadka oo surmiyey bay furaan, suluf abaar wene,
Oo weliba seetada xigga ah laysu saaraaye,
Adduun lama sinnee geelu waa, siinad gooniyahe.

**Cumar Xusen (ustraliye)**

**Layli : Gabaygan kor ka baro.**

Geelu muxuu u yahay Somalida?

Ka sheekee gabayaagu wuxuu doonayo.

**«Hantiwadaagnimada ku dhisan cilmiga oo keliya, ayaynu kaga xoreyn karnaa dalkeenna gumeysiga.»**

**Jaalle Maxamed Siyad Barre, madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliya. (21 Nofembar 1971).**

## Casharka 32

## CAQIIDADA

Ilaaheenni jaliilka ahaa,
Labaatan sifaa u waajibey,
Inuu jira baa u waajibtayoo,
Haddii uusan jirin ma joogneen,
Hadduu ina joojiyaad aragteen,
Inuusan jirin ma suurowdaa,
Inuu jiri jiraa u waajibtayoo,
Haddii kale yaa jirreysiiyey
Inuu jiri jiraa u waajibtayoo,
Haddii kale yayna jaaseyn,
Jinni iyo insiba waa khilaafsan yahoo,
Haddii kale waaba jeeskood,
Sidii dadka jiir iyo dhiig ma leh,
Sidii axad meel ma joogsado,
Jibaanjibadeenna madax ma leh,
Jinaad iyo feero iyo dhinac iyo,
Calooliyo bariyo joof ma leh,
Jaliil jaah horiyo dabo ma leh,
Ilaah jismigeenna haw deyin
Haddii kale laysku jaangoo,
Jaliil kelinnimaa u waajibtey.
Ninkii jigtayow jaximo gal.

Ina Cabdulle Xasan

## Casharka 33
## DHAGAR

Nin baa beri nin u yimid. Markaasuu ku yiri: «Waxaan doonayaa inaad khayaanada i barto». Markaasa ninkii yiri, «Waa tahay e hashaada ii soo lis»». Markaasuu hashiisii u soo lisay. Markuu ninkii caanihii dhamay buu ku yiri, «Haddaba khayaanadii i bar?». Markaasaa ninkii yiri: «Waa taas aan hashii kaaga maalay». Markaasaa ninkii afka kala qabtay.

## LAYLIYO KALA GAARGAAR AH

Saddexdan qaybood ee hoos ku qoran mid walba toban eray oo kala gaargaar ah oo fal ah ka raaci, si hadalku ku dhammaado:

I) ............... jirey, II) ............... doonaa, III) ............ lahaa.

Qor toban tixood oo hadallo saxan ah oo ka bilowda «HADDAN» iyo toban kale oo ka bilowda «MAXAAD».

Qor toban eray oo kala gaargaar ah oo ku dhammada ............ YAHAY, iyo toban kale oo ku dhamaada ............ TAHAY dabadeedna waxaad qortaa naxwaha magaca ay ku leeyihin.

**Casharka 34**

## WARQAD ARDAY SAAXIIBKIIS U DIRAY

Arday ku nool magaalada Xamar oo la yiraahdo Jamac Guled oo dhigta dugsiga hoose fasalka afraad, ayaa warqad u diray arday kale oo saaxiibkiis ah oo ku nool magaalada Baydhaba oo la yiraahdo Gacal Geddi. Warqaaddiina sidan buu u qoray.

Jamac Guled
Dugsiga Hoose ee Hodan
15-12-1972

Saaxiibkay Geddi,

Waxaan jeclaystay inaan mar labaad warqaddan kuu soo qoro adiga oon middii hore ka soo jawaabin. Waxaan kaloo ku sheegayaa inaan la kulmay hooyadaa oo iga kaa waraysatay. Waxayna ii sheegtay, inay kuu soo diri doonto wixii aad u baahan tahayba. Salaan iyo duco badanna way kuu soo dirtay, waxayna kugula talisay inaad dadaashid oo aad wax baratid.

Saaxiibkayow, warqaddan markaad heshid waa inaad dhaqso uga soo jawaabtaa, waxaadna ii soo dirtaa buuggii aad iga qaadatay markii aynu Xamar ku kulannay. Nabad-gelyo.

Saaxiibkaa
Jamac Guled

**Layli :**

Waxaad qortaa jawaabtii xaashada adoo iska yeelaya «Gacal Geddi».

## Casharka 35

## DHURWAA IYO DAWOCO

Maalin baa Aar, oo ah suldanka habar dugaag, si xun u bukooday. Habar dugaag oo dhan baa soo booqday dawoco maahee. kolkaasuu dhurwaagii aarka ku diray oo been uga sheegay dawacadii. Dhurwaagii wuxuu aarkii u sheegay in dawacadu kibir la maqan tahay.

Aarkii oo caraysan baa dawacadii oo dhusdhus lihi u timid. Kolkuu libaaxii weydiiyey waxay la maqnayd, bay tiri, «Suldaan daawo fiican baan kuu raadinayey!».

Markuu libaaxii weydiiyey inay soo heshay daawadii iyo in kale, waxay tiri, «Dawadii waan soo helay ee waa inad dhuuxa ku jira dhudhunka dhurwaaga ku subkato». Markaasaa libaaxii ku dhegey dhudhunka waraabaha oo jebiyey oo dhuuxiisii ku subkaday. Sidaas bay dawacadii dhurwaagii uga aargudatey.

**Layli :**

1. Dhurwaagu muxuu ugu diray libaaxa dawacada?
2. Waraabaha iyo dawacada yaa caqli badan?
3. Sidee bay dawacadii uga aargudatey waraabihii?

## WERSHEDDA JAAJUURKA

Guryaha waxa laga dhisaa dhagax, jaajuur ama looxaan. Daaraha dhagaxa laga dhisaa ka raagsiinyo badan kuwa kale. Dhagaxa jebintiisa iyo qoriddiisu hawl badan bay u bahan tahay. Dhulka qaarkiis dhagax daaraha lagu dhiso lagama helo. Sidaas darteed, waxa loo baahdaa in la helo wax dhab u adag oo dhismada dhagaxa lagu beddelo.

Farsamada cusubi waxay heshay jaajuur ka kooban ciid, ama dhoobo iyo sibir laysku qasay oo qorraxda lagu engejiyo. Dhulka qorraxdu ay ku yar tahay jaajuurka waa la dubaa, si loo adkeeyo. Daartii jaajuurka duban laga dhisaa, boqol sannaadood iyo in ka badan bay gaartaa. Sidaas darteed jaajuurka si fiican loo sameeyo, dhagaxa kama liito. Ciid kastaa jaajuur ma noqoto, tan badda xeebteeda taal ee aan qoryo iyo quruurux lahayn baa u fiican. Dhoobada cas oo dhulka dhoobeyda ah laga helo waa tan laga sameeyo jaajuurka duban.

Magaalada Xamar, wershedo badan oo lebenka lagu sameeyo baa ku yaal. Daaraha beledka badidoodu, waxay ka dhisan yihiin leben iyo dhagax iyo ciid dhulka laga qoday. Baraakooyinka, cariishyada iyo mundulleyaashu waa sii yaraanayaan, oo daarihii baa ka tiro batay.

Wershedaha lebenka, shaqaale badan baa ka shaqeeya oo ku dhaqan. Dadkaasi dhismaaha dalka qayb weyn bay ka hayaan oo alaabadii guri lagu dhisi lahaa bay sameeyaan. Farsamadaas oo dhan, dad Somali ah ayaa haatan qabta oo gacan shisheeye u baahnayn. Taasi waa tallaabo horukac ah oo dhismaha dalka ku saabsan.

**Layli :**

1. Jaajuurka maxaa laga sameeyaa?
2. Guryaha maxaa lagu dhisaa?
3. Farsamadaas yaa ka shaqeeya?
4. Sidee loo dubaa jaajuurka?

## Casharka 36

## TALO ODAY

Ninka Ina Sanweyne la oran jirey ayaa beri nin u yimid. Markaasuu ninkii Ina Sanweyne ku yiri: «Adeer, inaad ila taliso baan kaa doonayaaye ila ta'i». Markaasuu Ina Sanweyne yiri: Oo waa maxay taladaad iga doonaysa?»

Markaasuu ninkii yiri, «Inaan afadayda furo baan doonayaaye ila tali». Markaasuu Ina Sanweyne ninkii si xun u eegay. Markaasaa ninkii Ina Sanweyne ku yiri: «Adeer, miyaad ii carootay? maxaad sida xun iigu eegtay?

Markaasaa Ina Sanweyney yiri: «Haa oo waan kuu carooday». Markaasaa ninkii yiri: «Oo maxaad iigu carootay?

Markaasuu Ina Sanweyne yiri: «Aniga reer la dhisayo baa layga talo geliyaaye ma reer la duminayo baa layga talo weydiiyaa?». Markaasuu ninkii isku sheexay oo haweenaydiisii deystey.

**Layli :**

Tixahaan dhammaystir·

1.................................................. waa lala tashadaa

2......................... iyo .....................iyo ......................... waa loo naxariistaa.

3.................................................. waa la dabaa.

4.................................................. waa la bedraa.

5.................................................. la deystaa

## Casharka 37

# X A J K A

Xajku waa tiir ka mid ah tiirarka islaamka. Xajku wuxuu ku waajibey qofkii awoodi kara. Waana inuu qofku Xajka tagaa intuu nool yahay, ugu yaraan hal mar .. Qofkii raba inuu badsado khayrka, dhawr goor waa tegi karaa Xajka.

Waqtiga Xajku waa bisha Arrafo, dadkuna waa inay diyaar u noqdaan. Dadka qaarkiis waa sii hor maraan oo bisha Soonfureed ama bisha Sidataal bay ka tagaan waddankooda, si ay u joogaan Maka bisha Arrafo. Iyaga qaarkood waxay ku safraan dayuurado, qaar maraakiib, qaar baabuurro, qaar awr, qaarna lug bay ku socdaan teer iyo Maka.

Xujeydu markii ay u dhawaadaan Maka waa xarmadaan, waxayna yiraahdaan: «Ilaahow waxaan rabnaa inaan xajino e noo fududee oo naga aqbal». Markaas bay dharkoodii hore iska baxshaan, waxayna qaataan labo gò oo cadcad oo aan tollayn. Goortaas laga bilaabo, xujeydu timaha ma xiirtaan, ciddiyaha ma jartaan, raggu madaxa ma daboosho, ,haweenkuna wejiga iskama daboolaan, cadar iskuma shubaan, kamana fakaraan wax maal addunyó ku sabsan ee waxay ku kacaan Ilaah caabud keliya: salaad la tukado, quraan la akhristo, duco la duceysto iyo wixii la mid ah oo wanwanaagsan.

Xujeydu markii ay yimaadaan Maka, Kacbada bay tagaan toddoba goorna way ku wareegaan. Dabadeed iyagu waxay yeelaan wixii Ebbe faray teer iyo maalinta sagaalaadka Arrafo.

Xujeydu Carafaadka waxay soo joogaan tan iyo maqribkii maalinta sagaalaadka. Ka dibna waxay u gudbaan Musdalifa oo ay soo joogaan ilaa habeen barka. Dabadeed waxay soo galaan Mina, iyaga oo qof waliba sito 49 ama 70 dhagax oo quruurux ah. Halkaas bay shaydaanka ku shiidaan iyagoo mar walba toddoba quruurux tuuraya oo mar walba shaydaanka naaraya.

Maalinta tobnaad, waa maalinta lidda Carrafo; Xujeyda maalintaas waxay joogaan Mina. Maalintaas iyada ah bay, xoolo badan qalaan, timaha iska xiiraan oo dharkii cadcaddaa iska beddelaan. Ka dibna waxay ku soo noqdaan Maka, iyagoo toddoba goor Kacbada ku soo wareegaya. Taasina waxay ka dhigan tahay wareeggii sagootiga ahaa. Isla markaasna, toddoba goor bay ku ordaan inta u dhaxaysa SAFA iyo MARWA. Xajka sidaas bay u gutaan. Dabadeed waxay aadan Madina, si ay u soo booqdaan qabrigii Nebigeenna Subbanaa, nabadgelyo iyo naxariis Ilaahay ha siiyo e.

Xujeydu maxaa aqoon dheeraad ah ay Maka ka helaan?

— In Muslinku adduunyada aad ugu badan yahay.

— In ay halkaas ku kala beddeshaan talooyinka wanaagsan.

— In boqor, miskiin, hodan, sabool, dhallinyaro iyo duqowba isugu mid la yahay Ilaah hortiis bay dhaayo arkaan.

— Dalkii xurmada lahaa ee Nebigeenna iyo asaxaabtiiba ay ku dhasheen kuna dhinteen, diinteenna xaqa ahina ay ka bilaabatay bay soo bartaan.

**Layli :**

1. Qofkee baa Xajku ku waajibey? Intee goor baase laga rabaa inuu tago?
2. Waqtiga Xajka la guto waa waqtigee; maxaase lagu tagaa?
3. Wax ka tilmaan dadka Xajka isugu yimaaddaa, maxayse sitaan?
4. Tegidda Xajka maxay tartaa xujeyda?
5. Maka iyo Madina maxay kala yihiin?

## Casharka 38
## TOGASHO GUUR

Beri buu inan damcay inuu guursado. Markaasuu jaalleyaashiis u yimid. Markaasuu ku yiri: «Jaallayaal waan guursanayaa ee wax ila qabta». Markaasay yiraahdeen: «Oo gabadhee guursanaysaa?» Markaasuu yiri, «Saddexdaa hablood tan ugu wanagsan sidee u garanaynaa?» Markaasuu nin nimankii ka mid ihi yiri,« Anaa garanaya si aynnu u xulanno». Markaasaa kuwii kale yiraahdeen: «Oo waa sidee?» Markaasuu yiri «Hablaha aynu wax weydiinno oo tii inoo jawaabta guursanno. Markaasaa raggii kale yiraahdeen, «Oo maxaynnu niraahnaa»? Markaasuu yiri, «Idinku ina keena».

Markaasay saddexdii hablood oo geed diiranaya u yimaadeen. Markaasaa hablihii laysa salaamay oo lays aqoonsaday. Cabbaar markii la haasaaway baa ninkii hablihii weydiiyey wax. Wuxuu yiri, «Hablow, saddexdaas hal waa maxay: Garow iidankii iyo geel xeraadii iyo rag gogoshii». Markaasaa midi tiri, «Allaylehe anaa garanaya. Garaw iidaankii waa subag iyo caano iyo geeda adari ku dar. Geel xeradiina waa casarkii laba nin xero ood u dir oo meel dugsi ah u yagleel oo xaska ka xaar oo miscirirta u adkee oo oodrogo wanaagsan iyo dhacan u soo goo, dabadeedna fiidka ku xaree. Rag gogoshiina waa aqal weyn u dhis oo ilaxir u yeel oo hoosta uga dadab o u gogol oo dermo

xariir ah iyo barkimo u dhig. Dabadeed halkiisaas ha seexdo». Markaasay nimankii labadii hablood oo kale mid ku yiraahdeen «Adigana maxay kula tahay»? Markaasay tiri: «Anna sida gabadhaas». Tii saddexaad bay markaas warsadeen. «Adna maxay kula tahay?» Markaasay inta cabbaar aamustay tiri, «Aniga waxay ila tahay», garow iidaankii waa qof u baahan sii; geel xeradiina waa xoog lahaw xoogna ku tiirsanaw; rag gogoshiina waa nabad.» Markaasay nimankii yirahdeen: «Gabadhaasaa garatay oo aannu guursanaynaa.» Markaasay guursadeen.

**Layli :**


1. **Erayadan midba shan tixood oo kala gaar ah geli:**
   Gogol, sii, lahaw, kuu, tiirso;
2. Sheekadani maxay ku tustay, maxayse murtideedu ku saabsan tahay?

**«.... Waa inaynnu la dagaallannaa cadawyadeenoo ah gaajo, cudur iyo aqoondarro. Waa inaynnu sare u qaadnaa shaqadeenna. Barwaaqada dhulkeenna taal waa inannu la soo baxnaa. Danaheenna Tawriga ahi, waxay ini tusayaan sidii aynnu intaas oo idil ugu hawl geli lahayn.**

**Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliya.** ..............

# Casharka 39

## GEDDISLEYDA



**Geddisley xoolo gadanaysa**

Geddisleydu waa dadka xoolaha nool ama moodka soo iibsada ee haddana sii gada iyagoo faaido ka doonaya. Hawl waliba waxay leedahay tab u gaar ah oo loo maamulo. Ninka geddisleyda ihi, waa inuu basar wanaagsan yahay, dadlasocdna leeyahay, had iyo jeerna weji furan yahay.

Hadduu dukaanley yahay, waa inuu dadka soo dhoweeyaa, si ay u jeclaadaan dukaankiisana ay wax uga gataan. Nin alla ninkii dadka si fiican ula hadla, aad baa loo jeclaadaa, dukaankiisana waa loo kale hor maraa, waxna waa laga gataa, fiicnaantiisana waa la tilmaamaa.

Diinta Islaamku waxay ka digtey inaan khayaano wax lagu maamulin. Maxaa yeelay, xoolihii khayaano lagu helaa dhib kama baxaan; waana booli aan wanaag lahayn

adduunyo iyo aakhiro toona. Hawlaha la ammaanay in laga xoogsado, waxaa ka mid ah, geddis aan khayaano lahayn, beer falid, farsamada gacanta, xoolo dhaqashada iyo wixii aad loogu dhidido.

Qofka aan cid dhibin ee wejiga furan ee basarka wacan leh, waa qofka meel kasta ku liibaana. Kaas oo kalena aad baa Ilaahay iyo aadmiguba u ammaaneen.

Somalidu waxay ku maahmaahdaa «nin qummani qaabdarro ma keeno».

**Layli :**

1. Shaqada middee baa ugu wanaagsan?
2. Weji furnaan maxaa la yiraahdaa?
3. Booliga xoolaha lagu helay ma qaadan lahayd?
4. Kabooluhu muxuu ka shaqeeyaa, farsamada kaboolu-huse ma kula xun tahay?

## Casharka 40

## QARAMADA MIDOOBEY

Dagaalkii labaad ee adduunyada ka dhacay (1939-1945) ka dib, 50 dowladood bay la noqotay inay yeeshan Urur ka dhexeeya. 24 Oktobar, 1945, magaalada San-Fransisko (Amerika) ayaa lagu asaasay Qaramada Midoo-bey. Dastuur baa loo dhigey wayna ogolaadeen dawladihii meeshas isugu yimid. Dawlado kale baa ku biiray ururkaas oo hadda waxay gaaraan 132 dawladood.

**Ulajeeddada Qaramada Midoobey:**

— In la ilaaliyo nabadda adduunyada,

— Dawlad walba, ha yaraato ama ha weynaatee, waa inay dhawrtaa oo xurmaysaa gobannimada dawladda kale,

— Dalalka la gumeysto waa in loo ogolaadaa inay aayahooda dambe ka taliyaan,

— Khilaafka dawladaha dhex mara, waa in si nabad ah lagu dhameeyaa,

— Dawladaha addunku waa inay iskaalmeystaan: xagga siyaasadda, xagga dhaqaalaha xagga tacliinta, xagga farsamada iyo xagga caafimaadkaba.

**Qaramada Midoobey waxay maamulaan:**

— Maxkamadda garsooridda adduunka ee ku taal magaalada «Lahay» (1)

— Guddiga wasaayadda ee ku shuqul leh arrimaha dalalka la gumeysto, wuxuuna ku yaal NiyuYork. (2)

— Guddiga dhaqaalaha iyo arrimaha guud ee ka shaqeeya sidii dhaqaale wanaagsan uu ku dhex mari lahaa dawladaha. Waxaa kale ee guddigaasi u qabtaa is

(1) waxay ku taal Dalka Holanda.

(2) waxay ku taal Dalka Maraykan.

kaalmeysiga xagga tacliinta iyo caafimaadka. Xaruntiisuna waa Niyu Yook.

**Laamaha raacsan Qaramada Midoobey:**

(3)
— Laanta tacliinta ee ku taal Baaris, waxay ka shaqaysaa si loo tirtiro aqoon darrada, tacliintana kor loogu qaadi lahaa;

(4)
— Laanta shaqada ee ku taal Jinefa, waxay ka shaqaysaa saacadaha shaqada iyo sidii dadka shaqaalaha ah iyo kuwa loo shaqeeyo ay wanaag ugu wada shaqaystaan.

— Laanta caafimaadka, waxay ku taal Jinefa. Waxay ku shuqul leedahay sidii cudurrada halista ah loo tirtiri lahaa, caafimaadka dadkana loo ilaalin lahaa,

(5)
— Laanta cuntada iyo beeraha oo ku taal Roma, hawsheedu waa in cunnadu badato. Ninka beerreyda ah iyo beertaba in aad loo xannaaneeyo, tacabka beerahana sifiican dadka loo baro.

---

(3) waxay ku taal Dalka Frans.

(4) waxay ku taal Dalka Suwisarlayn.

(5) waxay ku taal Dalka Talyaniga.

Qaramada Midoobey maxay na tareen? Waxay na tareen wax weyn oo aan la hilmaami karin. Iyagu waxay ku dhawaaqeen in Somaliya,, 10 sano gudaheed, ay qaran

xor ah ku noqotaa. Markaas taariikhdu waxay ahayd 1959.

Abaal weyn bay Somalidu u haysaa Qaramada Midoobey.

**Layli :**

1. Wax ka sheeg ulajeeddada Qaramada Midoobey.
2. Magacow laamaha raacsan Qaramada Midoobey: Maxayse taraan?
3. Maxay na tareen Qaramada Midoobey?
4. Laamaha Qaramada Midoobey wax ka sheeg.
5. Laan walba hawshay qabato wax ka sheg.

## Casharka 41

## JITAABIN YAR

Sheekadan yar akhri dabadeedna su'aalaha hoos ku qoran ka Jawaab:

Beri baa waxa jirey nin faaliye ah. Dalka uu joogeyna hodan buu ahaa oo xoolo badan iyo beero badan buu lahaa. Faaliyihii waa la imtixaanay, Ilaah baase ka saaray.

1. Ninku muxuu ahaa?
2. Dalka uu joogey, muxuu hodan ka ahaa?
3. Maxaa lagu Sameeyey Faaliyaha?
4. Imtixaankii ma ka baxay mise wuu ku xirmay?

## Casharka 42

## BALLANFUR

Nin baa beri meel mas ku jiro degey. Markaasuu maskii arkay. Maskuna mas daallin ah ma ahayn. Casha walba carruurta iyo xoolaha dhexdooduu iska mari jirey oo waxba ma yeeli jirin.

Maalin dambe baa ninkii tashaday oo isyiri: «Waar horta maskani yaanu xoolaha iyo carrurta kaa cunine maad dishid?» Markaasuu maskii oo geed jirriddisa hurda u yimid oo isyiri: «Seef qoorta kaga dhufo». Markaasuu la waayey oo ay seeftii jirriddii geedka ku dhacday. Markaasaa maskii toosay oo cararay oo god galay.

Habeenkii markii la seexseexday buu maskii soo baxay oo ninka inankiisii curad qaniiney. Markaasaa inankii dhintay.

Subixii baa ninkii maskii u yimid oo ku yiri: «Waar masyohow! aan wacatanno oo isdeynno?».

«Marakasaa maskii yiri: «Waar ninyohow, berigii horeba waa taynnu nabadda ahayn ee aad goysey. Imminkana, intaan raadkaas seefta ee jirridda geedka ku taal arkayo, adna inankaaga xabaashisa aad arkaysid, wacad inoo xirmi maayo, oo heshiinmayno ee ina kala kexee.

**Layli :**

1. Muxuu u maagay ninku maska?
2. Masku muxuu reerkii ku falay?
3. Ninku markuu heshiis ka doonay maska, muxuu maskii ugu jawaabay?

## Casharka 43

## YAAB YAABKII IYO AMANKAAG

Ninka Ina Cali Qablax la oran jirey baa maalin dundumo hoos fariistay. Ina Cali Qablaxna wuu indho la'aa. Markaasuu dundumadii taabtay. Markaasuu ninkii la socday ku yiri: «Waar horta bahashan dundumo la yiraahdo iiga warran», Markaasaa ninkii yiri: «Dee abborkaa habeenkii candhuuftiisa ku sameeya». Markaasaa Ina Cali Qablax yaabay oo yiri: «Hal waa yaab, halna waa amankaag».

Markaasaa ninkii yiri: «Dundumada inteer le'eg, aboor baa sameeya waa yaab, habeenkii buu sameeyaana waa yaabka yaabkiis, candhuftiisuu ku sameeyaana waa amankaag!!?».

**Layli :**

1. Ninkii indhaha la'aa muxuu taabtay, muxuuse la yaabay?
2. Aboorku intee buu le'eg yahay?
3. Aboorku ma cayayaan baa mise ma aha?

## Casharka 44

## SADDEX DIBI IYO LIBAAX

Waa baa meel waxaa wada joogey sadddex dibi iyo libaax. Sadeexda dibi mid waa caddaa, midna waa guduudnaa, midna waa madoobaa. Dibidu aad bay u xoog badnaayeen, gees fiiqfiiqan oo sida waranka wax u mudana way ku yaalleen. Iyagu waxay heshiis ku ahaayeen inay isu hiiliyaan haddii cadow uu ku yimaado

Ayaantii dambe, ayaa libaaxii gaajooday kuna dhici kari waayey inuu mid ka cuno dibida. Libaaxii aad buu u fakaray wuxuu goostay Inuu dhagro dibida, si uu u gaajo beelo. Libaaxii wuxu u yimid dibigii madoobaa iyo kii guduudnaa, wuxuu ku yiri: «Ma og tihiin dibiga caddi inuu idinka faanay oo igu yiri, 'aniga labadaas dibi la joogistoodu waa i dhibaysaa, maxa yeelay, anigu waa ka qurxoonahay».

Labadii dibi waa ka caroodeen saxiibkoodii caddaa. Markaas baa libaaxii u soo jeediyey labadii dibi talo, wuxuuna ku yiri: «Idinku berri ha la daaqina dibigaas oo ka fogaada, aniguna waxaan dhegeysan doonaa bal hadba wuxuu idin ka sheego». Waaberigii ayaa labadii dibi aayar ay ka fogaadeen meeshii uu daaqayey dibigii caddaa.

Dabadeed libaaxii baa u yimid labadii dibi, wuxuuna ku yiri: «i dhegeysta, dibigii caddaa waa tagey, wuxuuna ii sheegay inuu doonanayo dibi kale oo midabkiisa leh, maxa yeelay, wuxuu yiri, Anigu dibidaas foolxumada badan leh lama joogi karo».

Dhawr maalmood ka dib, ayaa libaaxii gaajooday, wuxuuna jecleystay inuu cuno labada dibi midkood, illowse wuxuu arkay inuu labadooda oo wada jira aanu la dagaallami karin. Markaas buu u yimid dibigii madoobaa, wuxuu ku yiri: «Adigu war ma qabtid! Ma og tahay inuu dibigii guduudnaa kaa faanay uu yiri. Ma jecli inuu i feer daaqo dibiga madoobi. Maxa yeelay, madawgiisa ayaan nacay». Markaasaa libaaxii u sheegay si uu u rumeysto. Wuxuu ku yiri «Bal in yar berri ka fogow.

Waxaad ogaan doontaa wuxuu falo e». Waagii markii uu baryey, ayaa dibigii madoobaa taladii libaaxa yeelay oo ka dheeraday dibigii guduudnaa. Markaas ayaa libaaxii intuu soo gaatamay, ku boodey dibigii guduudnaa. Markaasuu markiiba diley. Maalmo ka dib, ayaa libaaxii u yimid dibigii madoobaa oo ku jeesjeesay. Wuxuu ku yiri, «Ma og tahay inaan maanta qado kaa dhiganayo!». Markaasuu dibigii madoobaa gartay in libaaxu saaxibbadiis diley.

Dibigii wuxuu ku jawaabay, «Anigu ayaantii aad dishey dibigii caddaa baan dhintay, nolosha hadda aan noolahayna waa mid dhalanteed ah». Libaaxii intuu ka carooday, ayuu ku soo boodey oo diley.

Wadajirku waa xoog, kala tagguna waa tabar darro.

**Layli :**

1. Libaaxu saddexdii dibi sidee buu u kala siray?
2. Sheekadaani maxay murti leedahay?

## Casharka 45

## KUBBADDA

Haddaan qofku fayoobeyn ma, xoogsan karo, nolol fiicanna ma helo. Fayoobida qofku waxyaalo badan oo lama huraan ah ayay ku xiran tahay. Waxyaalahaas cayaaraha lagu jimicsado baa ka mid ah, sida orodka, bootinta, legdanka iyo kuwo kale. Jimicsiga oo dhan cayaarta kubbadda, ayaa laga helaa, sidaas awgeed Cayaaraha Somaliya laga cayaaro, kubbaddu wa ka mid. kubbaddu caan bay ku noqotay dunida oo dhan. Kooxaha dhallinyarada ahee kubbadda cayaraa, way badan yihiin, magacyo kala duwanna way leeyiiin.



**Sida Kubbadda loo cayaaro**

Markii kooxahaas laba ka mid ahi ay wada cayaarayaan, reer magaaluhu way u daawasho tagaan.

Daawashada kubbaddu maaweelo weyn bay dadka u tahay, aad iyo aad baana loo jecel yahay, dhallinyaro iyo waayeelba. Dadka kubbadda daawanaya, qaar baa waxay la dhan yihiin ama la jiraan labada kooxood oo wada cayaaraya midkood. Inta cayaartu socoto dadka qaarba waxay dhiirri geliyaan kooxda ay la jaal yihiin, ama la jiraan. Sacbin, or, iyo mashxarad, bay isku daraan. Markii gool dhashana way iswada taagaan, boodboodaan oo koofiyadaha, go'a sare iyo masarkay kor u tuuraan farax daraadiis.

Iyagu waxay ku murmaan kooxdaasaa adkaanaysa iyo ma'ahee tan kale ayaa adkaanaysa. Sharad bay ka la dhigtaan oo hadba kooxdii badisa, kuwii la jirey baa sharad kii hela.

Maaweelada ka sokow, kubbaddu waxter kalena way leedahay. Ismaqal, wadajir wax loo qabto iyo feejigaan baa laga bartaa caayarta kubbadda. Meeshaasi waa goob guul iyo guuldarraba ay yaalliin. Goortaad adkaatid xarragaa lagala tagaa goobtaas, markii lagaa adkaadana samir iyo rajo dambe ayaa laga yeeshaa. Sidaasu qofka dersi weyn bay u tahay.

Lacagta dadka laga qaado kolkii kubbadda la cayaarayo, dawladdu cayaaraha horukacooday ku maamushaa. Goobaha lagu cayaaro, sida tan weyn ee magaalada Xamar ku taal iyo shaqaalaha ka shaqeeya lacagtaasaa badanaaba lagu maamulaa. Kooxaha kubbaddu markay beled ama dal kale u dhoofaan,

lacagtaasaa lagu masruufaa. Haddi kooxaha cayaaraha ee dalalka shisheeyuhu Somaliya soo booqdaan, lacagtaasaa lagu marti sooraa. Sidaas darteed, dadku lacagtooda bilaash uma bixiyaan.

Cayaarta kubbadda, iyo cayaar oo dhammi waxtar weyn bay u leedahay tababaridda dhallinyarada dalka. Haddii qofku aanu cayaraha ka qayb geline had iyo goor meel fadhiyo, xubnihiisu ma kala baxaan, fayoobi badanna ma helo qofkaasi. Qof aan fayoobayni ma xoogsan karo, nolol fiicanna kuma noolaado. Cayaar-yahanku weligiis waa fayow yahay, hawshana kama daalo.

**Layli :**

1. Wax ka sheeg waxyaalaha lagu fayoobaado?
2. Cayaaraha Somaliya lagu cayaaro maaxa ka mid ah?
3. Dadku muxuu ugu daawasho tagaa halka kubbadda lagu cayaarayo?
4. Lacagta laga qaado dadka kubbadda daawada sidee loo galaa?

## Casharka 46

## GABAR FIIRO DHEER

Nin reer baadiye ah, baa saddex rati reerkiisii ka lumeen. Kolkaasuu ninkii baadidoon tegey. Intuu socdey wax raad ah buu dhulka kolba ka fiirinayey. Geelii daaqaya ee uu arkaba wuxuu ka raadinayey saddexdii rati. Ciddii uu arkana awrtuu haybiayey. Saddexda rati mid kasta tilmaan gooni ah buu lahaa.

Ninkii wuxuu socdaba, wuxuu u yimid gabar ari badan iyo awr la joogta. Gabadhii waxay sidatey, maro saddex qayd ah, boqor iyo dhacle, sindiyo iyo kabo xardhan. Markaas gabadhu xarig bay soohaneysey, geed hoos lehna may hoos taagnayd.

Kolkuu ninkii gabadhii waraystay bay weydiisey oo waxay tiri, «saddexdaada rati, mid ma daba la'aa, midna ma kurus qalloocnaa, kan kalena ma il la'aa.?» Ninkii oo markaas hadalkii u bogey baa gabadhii ku yiri, «Walaashay waa sidaad u tilmaantay awrta e, xaggaad ku aragtay?».

Gabadhii, waxay tiri, «Awrtii maan arag, waxaanse arkay raadkoodii». Ninkii oo yaabban baa dabadeed yiri, «Haddii aadan awrtii arag oo aad raad keliya aragtay, maxaad ku garatay tilmaantay lahaayeen oo aad haatan sheegtay?».

Gabadhii oo muujinaysa aqoontay xoolaha u leedahay baa tiri, «geelu markuu saaloonayo dabaduu ku firdhiyaa, illowse awrtaada midkood saaladii meel keliya buu ruumiyey. Kan Kuruska qalloocana, waxaan ku gartay, halkii uu ku gelgelimeystey gees baa dhulku qodmay. Kan isha la'na waxaan ku gartay, dhirta barbar keliya buu ka daaqayey!».

Kolkii ninkii ku soo noqday gurigiisii goor caweysin ah buu walaalihiis oo ardaagii fadhiya wax yar maaweeliyey. Gabay ammaan ah oo ku saabsan sida la yaabka leh ee gabadhii awrta ugu tilmantay, buu ninkii golihii ka tiriyey. Wuxu yiri:

Walle geenyo aan shalay arkoo
Geligan maaxeysey,
(1)
Oo maro gabiibliyo xirnayd
Laba sindoo gooyey,
Oo dhacluhu labadeeda gobol
Gow ka kala siisey,
Oo timaha qaar baa guntee
Gedef u sii deysey,
Oo naasku qaar buu gò aye
Giijey maradeeda,
Oo gaabni waa lagu nacaaye,
Gobol saruu dhaaftay,
Oo midabka qaar baa gubtee
Gini la moodaayo,
Kolley anigu waa gaarayaa gobolladoodiiye.

---

(1) Waa midabka carro guduudka ah.

«Iskaashiga, wadajirka iyo xoogsigu waxa weeye hubka inoo jiidaya ciribdanbeed adag iyo horukac wacan».

Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliya, (27 Jun 1971).

## Casharka 47

## GABAYGII KOOFIL

Kolkii Kofil oo ciidanka Ingiriska watey ay Darawishtu ku dishay meesha la yiraahdo «Dulmadobe» (1) ayaa Sayidkii gabaygan ka tiriyey.

**Adaa Kofilow jiitayoon dunida joogeyne,**
**Adigaa jidkii lagugu wadi jimic la'aneede**
**Jahannama la geeyow haddaad aakhiruu jahato.**

* * *

**Nimankii jannuu kacay war bay jirin inshaalleye**
**Jameecooyinkii iyo haddaad jowhartii aragto**
**Siduu Eebbahay kugu jirrabay mari jawaabteeda.**

* * *

**Daraawiish jikaar nagama deyn tan iyo jeerkii dheh,**
**Ingiris jabyoo waxa ku dhacay jac iyo baaruud dheh,**
**Waxay noo jajoonteenba waa jibashadiinnii dheh.**

* * *

**Jigta weerar bay goor barqa ah nagu jiteeyeen dheh,**
**Anigana jikray ila heleen shalay jihaadkii dheh,**
**Jeeniga hortiisay rasaas igaga joojeen dheh.**

* * *

**Jiiraanyaday ila dheceen jilic afkoodii dheh,**
**Siday kuugu jeexeen magliga jararacdii sheego,**
**Billaawuhu siduu kuu jarjaray jiirarka u muuji.**

---

(1) Goobtaa Dulmadoobe, magaalada Burco waxay u jirtaa in 40 mayl ah. Goobtaas lib weyn baa Darawishtu ku heshay.

## Casharka 48

## DAARTA XUSUUSTA

Dal kastaa wuxuu leeyahay dhaqan iyo taariikh u gaar ah dadka dalkaas deggan oo waa dhaxalkii facyaalihii hore uga tageen. Dadkii aan dhaqankaas iyo taarikhdaas xannaaneyn, waa dhaxal wareegaan oo majarahaa ka luma. Sidaas darteed, dàda dhallinta yar waa in la baro sheekadooda iyo hiddaha dalkooda.

Xusuusta iyo dhaqanka dalka Somaliyeed, waa mid qoto dheer leh oo qof kasta oo Somali ahi ku faani karo Hase ahaate, dhallinyaradu ma wada taqaan dhaqankooda iyo taariikhdooda· Somalinimadu ma aha in qofku dalka ku dhasho keliya ee waxa loo baahan yahay in qofku sal iyo baar u yaqaan nolosha iyo dhaqanka dhulka uu ku



**Aqallo Somali**

dhashay. Dhaqanka dadku wuxuu ka kooban yahay afka ay ku hadlaan, dharka ay qaataan, alaabta ay ku dhaqmaan, soorta ay cunaan, farsamadooda, murtidooda iyo waxyaalo kale oo badan oo nafta dadkaas ku xiran.

Dad walba waxaa la gudboon waxyaalahaas gundhigga u ah dhaqankooda iyo hiddahooda inay bartaan oo ay xannaanaystaan, si dàda ku xigtaa aanay u dhaqan wareegin.

Magaalada Xamar waxaa ku taal daar lagu xannaaneeyo dhaqanka iyo xusuusta dadka Somaliyeed. Daartaasi waa tan ku dhow xafiiska hawlaha magaalada laga maamulo ee Dawladda Hoose.

Alaabta dadka Somalidu ku dhaqmaan oo dhan baa daartaas dawladdu ku ururisay, si aanay u lumin ama loo halmaamin. In qof kastaa alaabadaas soo daawado waa lamahuraan, si uu ku ogaado dhaqanka dalkiisa.

Mamulka dhaqanka dadka, waxaa lagu qaybiyey laan ka mid ah Wasaradda Waxbarashada. Markaad daawasho u tagtid daarta xusuusta, waxa kula kulmaya dadka ka shaqeeya meeshaas. Iyaga hawshoodu waxay tahay xannaanada alaabada iyo inay dadka daawanaya tusaan oo uga sheekeeyaan wax kastaa waxay yihiin iyo waxay taraan.

Haddaan sidaas laguu hor kicin, waxa laga yaabaa inaad alaabada tirada badan ee daarta ka buuxda ku indhasarcaadid oo aadan dhab u garan waxay yihiin iyo ulajeedadooda.



**S a t i**

Alaabada daarta xusuusta taallaa, wada koobi mayso waxa dadku ku dhaqmo oo dhan. Meeshaas waxa laysugu keenay alaabta Somalida badankeedu ku dhaqanto, oo ay ka mid yihiin dharka, hubka dagaalka, alaabta guriga,

weelka xoolaha lagu waraabiyo iyo hargaha lagu xiro, alaabta doonyaha iyo qalabka kalluunka lagu jillaabto, dahab iyo lacgtii hore oo dalka looga dhaqmi jirey iyo boqollaal waxyaalood oo kale. Waxaa kaloo yaal xaashiyo ka sheekaynaya taariikhda dalka Somaliyeed iyo Afrikada Bari boqollaal sano ka hor. Alaabta halkaas taallaa afar kun oo shay ka badan.

Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in marar badan la soo daawado daarta xusuusta, si loo ogaado alaabta taal oo dhan. Daawashada daarta xusuusta waa lamahuraan, maxaa yeelay, wax weyn oo kaa dhiman baad ku arki doontaa.

**Layli :**

1. **Erayadan ujeedadooda sheeg**

   Dhaqanka, dhaxal, facyaalo, gundhig.


2. **Ka jawaab su'aalahan.**

1. Daarta xusuustu maxay tahay?
2. Waxyaalaha lagu arki karo dartaa xusuusta, maxaa ka mid ah?
3. Sheeg 10 waxyaalood oo ka mid ah alaabta dadkeennu waagii hore wax ku qabsan jirey?
4. Daarta xusuustu maxay waxtar u leedahay hiddaha iyo dhaqanka Somaliyeed?

## Casharka 49

## MADBACADDA

Madbacaddu waa makinadda buugagga iyo wargeysyada daabacda. Intaan makinaddaas la hindisin, gacanta oo qura ayaa wax lagu qori jirey. Qoridda gacantu hawl weyn oo raagsiinyo badan bay lahaan jirtey. Buug 100 xaashiyood ah muddo sano iyo dheeraad ah baa lagu qori jirey gacanta, iyadoo dad badani hawshaas fulinteeda isugu tagi jirey. Sidaas darteed, buugag badan oo la akhristaa ma jirn, dadka wax qori karey waxnà akhriyi karey waagaas way yaraayeen.



**Madbacadda ugu weyn magalada Xamar**

1455 nin Jarmal ahaa oo la oran jirey Johann Gutenburg, ayaa wuxuu hindisey makinadda daabaca. Taasi waxay ahayd tallaabo weyn oo aqoonta iyo farsamada horay u qadday. Durba buugaggii iyo dadkii

wax akhriyi karey baa batay ka dibna, wargeysyo ayaa la soo saaray wixii dhaca oo dhan ka faallonaya. Horumarkaas weyn ee xagga aqoonta iyo sancada ah, mudda dheer ka dib, baa dadku gaarey. Daabicidda buugagga iyo wargeysyadu waa xubin ka mid ah warfaafinta dunida cusub. Qaranka 20d qofka ku nooli, warka dunida wuxuu baahi ugu qabaa sida soorta. Xubnaha warka faafiya, wargeysyada iyo raadiyaha yaa ugu weyn. Raadiyaha war kooban baa laga sii daayaa.

Wargeyskuse war tifaf tiran oo buuxa ayuu faafiyaa. Wargeysku shanta qaaradood wixii war ah oo ka dhaca ayuu weriyaa, shar iyo khayrba. Sidaas awgeed, adoo sariirtaada dul jiifa, ayaad warkii shanta qaaradood wargeyska ka akhrisan kartaa. Wargeyska wararkaas oo dhan kuu sidaa, 20 senti oo keliya buu joogaa.

Magaalada Xamar dhawr madbacadood baa ku yaalla. Kulligoodna, dawladda ayaa iska leh. Madbacadda ugu weyn waxa la dhisay 1965. Xaashiyaha iyo buugagga dawladdu wax ku qorato oo dhan iyagaa daabaca.

Sidaas darteed madbacaduhu dowr weyn bay ka cayaaraan horumarka dalka.

Madbacaduhu waagii hore waxyaalaha ay daabacaan way koobnaayeen, haatanse sida laga arkay waxyaalo badan oo hawl ah bay kordhiyeen. Hawshu siday u badan tahay waxaad ka arki kartaa, in har iyo habeen ay furan yihiin oo wax daabacayaan. Taasoo ku tusaysa inay


dhaqaalahana kor u qaadayso, baahida dadku u qabo wax-akhriska buugta, xaashiyaha iyo musawirrada ay wax weyn ka qabteen kana qaban doonaan.

**Layli :**

1. Waxaad sheegtaa sida loo hindisey madbacadda.
2. Madbacaddeenna weyn hawl badan bay qabataa, maxaa ka mid ah?

## Casharka 50
## WERSHEDDA CAANAHA

Somaliya waa dal xoloo badan leh. Sidaas darteed, waxa dadku cuno ama cabbo waxaa u badan hilib iyo caano. Caanuhu waa waxa keliya ee ugu dheef badan



**Makiinadda caanaha sameysa**

soorta. Markay doog tahay ee xoolaha miyiga joogaa ay dhalaan, Caano badan baa laga lisaa. Caanahaas dadku ma wada dhami karo oo uma baahna, markaasaa caanaha dheeraadka ah, inta subagga laga baxsho, ayaa la qubaa. Dal sidaas caanaha looga qubaa ma jiro, Somaliya maahee.

Hase ahaatee degmo kastaa caanaha ma qubto. Marka reer miyigu caanaha qubaan, waxa suurtowda reer magaaluhu inayan caano ku filan qabin. Xoolaha badidooda miyigaa lagu dhaqaaleeyaa, magaaladana neefaf aan badnayn oo caanateel ah ayaa jooga. Reer miyiga magaalooyinka ag deggani, caanaha aanay u baahnayn beledkay ka iibsadaan. Kuwa meel fog degganise beledka sooma gaaraan oo caanaha uma iib geyn karaan.

Caanaha reer miyigu qubaayo, iyagoo meel kale looga baahan yahay, waa dawdarro weynoo dhaqaalaha dalka naafaynaysa. Sidaas darteed, dawladdu waxay dhistay wershed lagaga shaqeeyo caanaha iyo subaggaba. Wersheddasi Xamar bay ku taal, waxana la dhisay 1965.

Baabuurro caanaha soo qaada bay Wersheddu leedahay. Reer miyiguna caanihi ay waagii hore daadin jireen, haatan wershedday keenaan oo ka iibsadaan. Caanaha lo'da oo keliya ayaana wershedda la keenaa.

Makiinad baa caanaha iyo subagga kala soocda, markaasaa midba gooni loo gadaa : inta dhalooyin lagu

shubo. Caanaha wershedda ama dhay baa lagu iibiyaa ama garoor.

Caanahaasi waa saafi oo cudur iyo cayayaan innaba loogama yaabo.

Caano la adkeeyey oo rootiga lagu cunaana way jiraan oo wersheddaa soo saarta.

Caanaha subag sixin ama burcad ah baa laga sameeyaa. Sixinka soortaa lagu iidantaa burcadkana rootigaa lagu cunaa.

Wershedda dad badan baa haatân ka xoojiya. Magaaladuna caano ku filan bay wershedda ka heshaa. Sidaas darteed, wersheddu qayb weyn bay ku leedahay horumarinta dhaqaalaha dalkeenna.

Gobol kasta oo dalka ka mid ahna wersheddaas oo kale ayaa laga dhisi doonaa.

**Layli :**

1. Waxaad sheegtaa caanuhu waxay nuxrur leeyihiin adoo sayniska xusuusan.
2. Wax ka sheeg sida wersheddu caanaha u farsamayso.
3. Immisa waxyaalood bay wersheddu caanaha u kala saartaa?
4. Wersheddu ma samaysaa subag?
5. Wershedda immisa shaqaale ayaa ku nool?

## Casharka 51

## ELETRIKADA

Intaan la ilbixin waxa la moodi jirey in dabaysha, biriqda iyo xoogagga kale jinniyo u taliyaan oo dadka lagu bajinayo. Markii aqoontu korodhay waxa la ogaadey in xooggaas abuurtu waddo oo mid waliba ulajeeddo gaar ah leedahay.

Ilbaxnimada dadku waxay bilaabatay markii dabka la helay. Iftiinka qorraxda ma ahee, iftiin kale qofku ma aqoon jirin. Uumiga dabka qofku waa ku diirsan jirey, soortii ceerinka lagu cuni jireyna wax buu ku bislaysan jirey, hub cadowga iyo duggaagga layskaga dhacshana wuu noqday.

1879 nin Maraykan ah oo la oran jirey Thomas Alva Edison yaa wuxuu farsameeyey nalka eletrikada. Waagaas horteed dadku xayr ama saliid bay shidan jireen. Helidda xoogga eletrikada wuxuu u keenay horukac weyn aqoonta dadka iyo farsamada. Qofka haatan jooga qarniga labaatanaad naftiisu waxay ku xirantay waxtarka xoogga eletrikada oo la'aanteed nolol fiicani aanay jirin. Gaadiidka iyo kuwa alaabada qaadaa, sida baabuurka, daayuuradda iyo maraakiibtu ma jireen. War dheereeya, sida taarka iyo raadiyaha ma jireen. Nalka magaalada ifinayaa ma jireen haddaan xooga eletrikadu jirin. Adduun mugdi ah ayaa lagu noolaan lahaa eletrikada la'aanteed.

Waxyaalaha yaabka leh ee xoogga eletrikadu keenay waxaa ka mid ah degidda dayaxa lagu duldegey iyo xiddigaha shishe ee loo sahan tegey durba; hubka ha!ista ah oo dagaalka loo samaystay; badda hoosteeda oo haatan bilo badan lagu noolaan karo.

Dalal badan oo Somaliya ka mid tahay, ayaan weli iftiinka eletrikadu guri kasta ka shidnayn. Eletrikada waxa soo saara makinado, ama biyo loo farsameeyey.

Iftinkaasi magaalooyinka waaweyn keliya ayuu ku eg yahay. Sidaas darteed dad badan oo reer miyi ah aqalladoodu iftiin ma leh oo weli way ka qatan yihiin iftiinka ilbaxnimadu keentay. Haddii dunida nabad joogto ah laga helo oo dhaqaalaha dala!kaasi ay kordhaan, aqoonta iyo ilbaxnimada ilayska eletrikadu guri kasta wuu iftiimin doonaa.

**Layli :**

**Ka jawaab weerahan:**

1. Waxtarka iftiinka ah ee eletrikada laga helay wax ka sheeg?
2. Thomas A. Edison muxuu farsameeyey?
3. Intaan eletrikadu jirin dadku biriqda maxay u malayn jireen?

## Casharka 52

## WARRAME IYO WARAYSTE

Nin meel maraya, ayaa ka hor yimid nin kale oo socoto ah. Kolkaasuu isyiri, 'ninkan baji oo war xun oo dhiillo ah u sheeg'. Wuxuu ku yiri, «waaryaahe hebel!» Markaasaa ninkii loo warramayey istaagey oo yidhi, «Hee!».

Warrame: Waar ma cg tahay dunida berri baa la rogayaaye?

Warayste: Oo sidee loo rogayaa?

Warrame: Dee waa la qallibayaa oo dad iyo duunyaba waa la rogayaa.

Warayste: Waar ninyahow, warkan aad sheegeysaa, waa war xun oo dhiillo ah. Ha yeeshee, haddii dunida la rogo, reerkayaga dan baa ugu jirta.

Warrame: Oo Sidee bay dani ugu jirta?

Warayste: Awrtii baa naga garbo beeshey oo haddii la rogo, beerkaannu ka raran lahayn.

**Layli :**

1 Sheekadaani maxay ku tustay?
2. Labada nin kee baa caqli badnaa?
3. Ninkii warramayey muxuu u sheegay ninkii kale?

## Casharka 53

## WAN GEESO LIHI MA IDAA MA RIYAA

Ari baa wan geeso lihi ku jiri jirey. Maalintii dambe ayaa reerkii ariga lahaa yiri: «Aan idaha wax ka shiraysanno». Markaasaa wankii madaxa sare u qaaday oo riyihii ku darmay.

Maalin kalaa haddana reerkii yiri: «Aan maanta riyaha wax ka shiraysanno» Markaasaa wankii barida soo jeediyey oo madaxii hoos u dhigay oo idihii raacay.

Siduu wankii marka la yiraahdo, «idaha ha laga shiraysto» riyaha u raacayey, marka la yiraahdo «riyaha ha laga shiraystana» idaha u raacayey, ayuu ku baxsaday.


**Layli :**

1. Wanku muxuu riyaha u raacayey markii la yiraahdo riyaha ha laga shiraysto?
2. Wanku ma caqli badnaa?
3. Riyaha iyo iduhu waxay ku kala duwan yihiin sheeg?

**«.... Saboolnimo leh gobonnimo iyo sharaf waxay ka door roon tahay hodannimo iyo barwaaqo gumeysi leh. Gobonnimada iyo sharaftu waxay ku jiraan isku kalsoonideenna iyo awoodeenna». Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimohqraddiga Somaliya (11 Setembar 1970).**

## Casharka 54
## KANAALKA SUWEYS

Kanaalka Suweys waa khoorri weyn oo ku yaalla dalka Masar. Wuxuu isku daraa labada badood, tan cad ee dhexaad iyo badda guduudan ee Waqooyigeenna ku taal. Dhererkiisu waa 160 Km. Intaan kanaalka la qodin seddax qaaradood , Afrika, Asiya iyo Yurub, wax kala iibsiga u dheexeeyey wuu yaraa. Dadka dhib weyn baa arrintaas ka haysatey. Maxaa yeelay, xagga berriga awr baa lagu mari jirey, xagga baddana doonyo ama maraakiib. Maraakiibta u socotaa Afrikada Bari iyo Koofur-Galbeed iyo Hindiya, waxay ka wareegi jirtey koofurta oo muddo badan bay ku dhixi jirtey.




**Kanaalka Suweys**

Kanaalka Suweys waa soodhinta kala barta Afrika iyo Asiya. Bari waxa ka xiga Asiya, Galbeedna Afrika.

Maraakibtu markay kanaalka marayso, waxa loo dhiibaa nimar aqoon u leh kanaalka. Ayagaa gudbiya. Maraakiibtaas. Markay gudbaan ka dib, baa Naakhuudihii markabka watey loo dhiibaa. Xagga Waqooyi meeshay Kanaalka iyo badda cad isaga darmaan, waxaa ku yaalla magaalada la yiraahdo BorSacid. Meeshay Kanaalka iyo badda guduudan isaga darmaanna waxa ku taalla magaalada la yiraahdo BorSuweys.

Waxa Kanaalka qoday sharikad Ingiris iyo Faransis isugu jirta. Mariddiisa waxaa run ahaan loo furay sannadkii 1869. Immisa sannadood baa ka dambeysey? Sannadku markuu ahaa 1956, Kanaanlka taladiisa waxaa la wareegay dawladda Masar. Imminka wixii dhaqaale ka soo baxa gaar ahaan dawladaas baa iska leh.

**Layli :**

1. **Meelahan magaca dadyowga ku nool sheeg.**
   Afrika, Asiya, Yurub, Andalus, Isbanya, Moroko, Masar.
2. Kanaalka Suweys maxaa loo dhisay?
3. Goortii Kanaalka Suweys la furay goormay ahayd?
4. Kanaalku dhaqaalaheenna muxuu u leeyahay?

Casharka 55

## DAACADNIMO WAA DAAWO

Waxa la yiri libaax iyo mas iyo dab iyo daad iyo xeelad iyo daacad baa beri hal wada lahaa. Maalintii dambay xeeladdii damacday inay intii kaloo dhan hasha ka qaadoo. Markaasay maskii u timid oo tiri: «Waar, horta ninkan libaax la yiraahdo, waa nin xoog leh oo intaas le'ege intuusan ina wada layn maynnu iska qabanno? Markaassa la yiri: «Oo sidee u qabannaa?

Markaasay xeeladdii tiri: «Dee, adaa mas ah oo yare, intaad miscirirta u gasho, markuu caawa soo gelayo qallac, dabadeedna muska gal»! Markaasuu maskii siddii yeelay oo libaaxii markuu habeenkii soo galay qallaco ku dhuftay oo muskii galay. Markaasaa libaaxii dhintay. Markaasaa maskii, illeyn waa nin dhiig qaba e, muskii ka soo bixi waayey. Markaasaa xeeladdii dabkii u timid oo ku tiri: «Waar dabow maskan libaaxi diley wax inaga reebi maayo oo berruu ina wada laynayaaye, maxaynnu ka yeellaa?» Markaasuu yiri: «Garan maayo ee maxay kula tahay?» Markaasay tiri: «Adaa dab ahe muska ku gub». Markaasaa dabkii muska ku gubay maskii. Markaasay xeeladii haddana daadkii u timid oo tiri: «Waa, dabkan arladii wada gubay wax inaga reebi maayo e inaga bakhtii» Markaasuu sidii yeelay. Markaasay iyadii iyo daacaddiii isku soo hareen. Markaasay tiri: «Naa hasha inoo kexee». Hashii bay inta kaxaysteen buur

la koreen. Markaasay Xeeladdii tiri: Naa hasha inoo lis». Hashii bay maaleen. Markaasay hashii haruubgaal ka buuxiyeen.

Markaasa xeeladdii hashii sibirta xoor ka marisay oo tiri: «Hadda daacadey, car xoorka hasha sibirta ka saaran leef!!» Markaasaa daacaddii garatay inay isleedahay hashu ha haraatido! Markaasay daacaddii tiri, «Hadda bal eeg, anaa leefayee!». Markaasay ku booddoo istiri leef. Markaasaa hashii harraati ku qaadday oo xeeladdii beerka kala goysey. Halkaasaa daacaddii oo keliyi hashii u hartay.

**Layli :**

1. Daacaddii iyo xeeladdii tee liibaantay?
2. Sheekadani maxay ku tustay?
3. Xeeladdii sidee bay u xeeladaysay libaaxii, dabkii iyo daadkii.
4. Xeeladdu maxay tartaa?

**«Saldhigga dhaqaalaha dad kasta iyo barwaaqadiisu waxay ka timaaddaa niyadiisa xoogga leh iyo tacliintiisa». Jaalle Maxamed Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliya (8 Nofambar 1969).**

## KU DHAWAAQA FARTEENNA

### (GEERAAR)

Afar dhawr qolo keentay
Midba uu dhan u jeedo
Isku soo dhacahayn
Iyagii is dhagraaya
Carruurteenna dhibaaya
Maskaxdii ka dhalaashay
Waxay soo dhabdhabeenoo
Dhar noo soo geliyeen
Dhunkaal weeye qaraaroo
Dhaxalkiisu khasaare
Dhinucuu ku hayaaye
Dhalanteediyo beeniyo
Waa dhaankii dabagaallee
Dhirfacawga lahaye
Haddaynnu tooda u dhaafno
Intii teenna la dhawroo

* * *

Dhaqankeenni horeetiyo
Murtideenna la dhuuxoo
Sayniskaa dhab u raacno
Dayaxaa naga dheer baan
Dhan ka fuuli lahaynoo
Dhagxan soo guran layne

Kuwii dhaarta rumeeyow
Ilaahay wax ma dhaafee,
Dhulka maalin u dhiibow
Kutubtii la dhigaayey
Kimisyoonki dhammeeye
Ka caddeeye dharaare
Dhaqso aan u qorree
Ku dhawaaqa farteenna

* * *

Tawraddaa dhalataye
Somali isu dhowaysay
Gacmaa lays dhunkanaayoo
Jaallow lays dhahaayo
Wixii meel ka dhinma
Siyad dheelli tiraayo
Weligeed ha dhisnaato e
Dhidibkeedu ha raago e
Kuwii dhaarta rumeeyow
Ilaahay wax ma dhaafee
Dulka maalin u dhiibow
Kutubtii la dhigaayey
Kimisyoonki dhammeeye
Ka caddeeye dharaare
Dhaqso aan u qorree
Ku dhawaaqa farteenna.

Axmed Cabdullahi Qaalib

# *TUSMADA BUUGGA*


| CASHAR | BAAL |
|---|---|
| Shiikh Shaafici | 1 |
| Wadaad iyo Shaydaan | 2 |
| Ninkii rida safriyey | 4 |
| Dhulka Andalus | 6 |
| Dawaco Gaajeesan | 8 |
| Xilkas | 9 |
| Muuska | 11 |
| Googaa Cadalle | 13 |
| Afrika | 14 |
| Dawladda Hoose | 16 |
| Abwaannimo | 17 |
| Geeddi Baabow | 19 |
| Xaaska | 20 |
| Guri Magaalo | 21 |
| Hello Fiiro Leh | 23 |
| Bangigu | 24 |
| Islaamka iyo Somaliya | 26 |
| Shiqley | 28 |
| Ilaha Biyaha | 30 |
| Bakhayl ha Noqon | 31 |
| Dood Hablood | 31 |
| Labadii Tuug | 32 |
| Cayaaraha | 34 |
| Boostada | 36 |
| Somaliga Wadaniga ah | 38 |
| Kumaan Ahay | 40 |
| Ma og tahay | 41 |

| CASHAR | BAAL |
| --- | --- |
| La jiifiyaana bannaan | 43 |
| Sekada | 44 |
| Telefoonka | 45 |
| Warshadda Sonkorta | 49 |
| Ammaanta Geela | 52 |
| Caqiidada | 54 |
| Dhagar | 55 |
| Layliyo kala gaargaar ah | 55 |
| Warqad arday saaxibkii u diray | 56 |
| Dhurwaa iyo Dawaco | 57 |
| Wershedda Jaajuurka | 57 |
| Talo Oday | 59 |
| Xajka | 60 |
| Togasho Guur | 63 |
| Geeddisleyda | 65 |
| Qaramada Midoobey | 66 |
| Jitaabin Yar | 69 |
| Ballanfur | 70 |
| Yaab Yaabkii iyo Amankaag | 71 |
| Saddex Dibi iyo Libaax | 72 |
| Kubbadda | 74 |
| Gabar Fiiro Dheer | 76 |
| Gabaygii Koofil | 79 |
| Daarta Xusuusta | 80 |
| Madbacadda | 84 |
| Wershedda Caanaha | 87 |
| Eletrikada | 90 |
| Warrame iyo Warrayste | 92 |
| Wan Geeso lihi ma idaa ma riyaha | 93 |
| Kanaalka Suweys | 94 |
| Daacadnimo waa daawo | 96 |
| Ku Dhawaaqa Farteenna | 98 |

**Waxaa lagu daabacay:**
**MADBACADDA DAWLADDA**
**— Muqdisho —**